JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

WASAARADDA HIDDAHA IYO TACLIINTA SARE

# "HALGANKII NOLOSHA,,

*Waxa qoray :*
*Jaalle Shire J. Axmed*

XAMAR 1973

1 1 2

# JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

## WASAARADDA HIDDAHA IYO TACLIINTA SARE

# "HALGANKII NOLOSHA"

lotta per la vita

*Waxa qoray :*
*Jaalle shire J. Axmed*

**XAMAR 1973**

*« Naftu waa maqnow, amase waa*
*mahad ku noolow e! ».*
*(Gabay)*

Bulxan wuxuu ku dhashay ceel degmada Mudug ku yaalla. Ceelkaas magaciisa waxaa la yiraahdaa Qorrof. Waa ceel meel dooxa ah ku yaalla. Biyihiisu way cad yihiin. Mar la arko, ceelkaas waxaa ka cabba geelal iyo lo' iyo aryo. Habeynkii dacdiisa waxaa ka cabba dugaagga. Dugaagga ceelkaas biyaha u soo doonta, waxaa ka mid ah waraabe, dawoco, dhidar, yey, ugaar iyo duur joog kale.

Hareeraha ceelkaas, waxaa deggan cidayow badan. Cidayawgaas badani, waxay leeyihiin xoolo badan. Cidahaasi, waxay u jiraan ceelka laba qad. Meelahaas laba qadka ah, ayaa lo'da iyo arigu daaqaan. Cidaha halkaas dega, waxaa ku jira reer Jaamac. Reerku wuxuu ka koobnaa hooyo Xaliimo, aabbe Jaamac, inantooda Faadumo iyo inankooda Bulxan.

Bulxan waa saddex jir. 1936 ayaa waxaa bilawday dagaal dhex maray gumeystaha fashiistaha Talyaaniga iyo Boqortooyada Itoobiya. Koofurka Soomaaliyeed, wuxuu markaas ku jirey taliska gumeystaha fasiistaha Talyaaniga. Jaamac markaas wuxuu ahaa nin xoog iyo lixaad leh. Gumeystaha fashiistaha Talyaanigu, wuxuu goostay inuu weeraro boqortooyadaas Itoobiya, oo ku darsado dhulka Soomaaliyeed. Sidaas daraaddeed, ayuu u baahday ciidan iyo askar Soomaaliyeed oo uu ku jebiyo boqortooyadaas Itoobiya. Jaamac markaas ayaa gumey-

staha fashiistaha Talyaanigu u qoray askar. Jaamac markaas wax shuqul ah ma haysan. Sidaas daraadded ayuu iska yeelay inuu ka mid noqdo ciidanka gumeystaha fashiistaha. Xaliimo iyo isagu markaas iskuma ay wanaagsanayn. Xiriirkoodu maalinba maalinta ka dambeysey wuu sii xumaanayey. Bulxan isaga oon weli naaskii ka go'in, ayaa waalidyadiisii is fureen. Bulxan waxaa loogu bixiyey markii uu dhashay ayuu dhaylo badan lahaa.Sidaas daraaddeed ayaa dadkii ku soo shireenoo waxay ku magacaabeen Bulxan.

Markii Xaliimo iyo Jaamac ay is fureen, ayaa Bulxan waxaa loo dhiibay cid kale oo xigto u ah Jaamac. Intii seddex sano ah, ayuu Bulxan la noolaa ciddaas. Waxaraha yaryar iyo naylaha, ayaa loo diri jirey. Galab qorraxdhac ah, ayaa dadkii oo dhammii ka bexeen gurigii oo qof waliba hawshiisii aadey. Isaga oo hurda guriga, ayaa lagaga tegey. Glabtii qorrax-dhicii ayuu Bulxan hurdadii ka toosay. Bulxan markaas wuu qaawanaa. Wuxuuna hurdey gasada aqalka. Aqalku wuxuu ahaa aqal soomaali. Hurdadii markii uu ka baraarugay, ayuu Bulxan goonyaha dhugtey. Markuu cidna ka waayey goonyaha ayuu iska dhaqaaqay. Habeynkii ayuu geed qaba ah, duggiisa seexday. Geedka qabada ah, wuxuu ka doonayey duggaal, maxaa yeelay dhar ma u xirnayn. Meeshu waxay lahayd dhaxan iyo foore. Dabayluhu waxay aad iyo aad u ruxruxayeen laamaha geedaha u dhow geedkaas qabada ah.

Intaas keliya ma ahee geyre ayaa dhacayey. Bulxan meel walba, wuxuu ka maqlayey foori iyo shanqar. Intaaso idiluba, waxay ku kordhinayeen baqdin iyo naxdin.

Bulxan dabaysha foorideedu markay sii adkaataba, wuu sii ooyi jirey! Intii saqdii dhexe, haddii ay oohintii wax ugu imaan wayeen, ayuu markii dambe iska aammusay isaga oo ay indhihii barbarareen ayna guduuteen.

Bulxan markii uu iska aammusay oo xasilay, ayaa waxaa ku soo baxay iftiin. Iftiinku wuxuu ahaa laba fallaarood oo ku taagan Bulxan. Habeynkaas mugdigu wuu badnaa oo wuxuu ahaa gudcur dam ah. Bulxan hadba wuu ka durkaa iftiinka illowse fallaaruhu waxay

ula durkaan meel walba. Bulxan markaan muunan ooyin, maxaa yeelay oohinu kuma harin. Sidaas ayuu ku gam'ay Bulxan. Waagu markuu beryey, ayuu ka toosay hurdadii. Wuu istaagay oo goonyaha dhugdhugtey. Markaas ayuu dhaqaaqay. Wuxuu arkay raad ari. Raadkii ayuu wuxuu u maleeyey inuu yahay raadkii arigii loo lisi jirey. Digadii ayuu ku tuujiyey farihiisa. Digadu in yar ayay qallalnayd. Bulxan markaas ayuu arrintaas ku farxay. Raadkii arigii ayuu qaaday. Subaxdii oo dhan hadduu socdey, ayuu harkii u yimid cid meel deggan. Naag aqalka ku jirtey, ayaa ku soo baxday. Markii ay warsatay, ayuu aqoon waayey wuxuu sheego. Bulxan waxa èeliya oo uu yaqaanno, waxaa weeye magaca aabbihiis iyo hooyadiis. Haweeneydii markii ay warsatay magiciisa, ayuu u sheegay.

«Magaca aabbahaa ma taqaannaa?...... waxaa weydiisey haweeneydii.

«Haa, waan aqaannaa magaca aabbahay!...... waa Jaamac!!!!...... Ayuu Bulxan ugu jawaabay haweeneydii.

«Hooyadaa magaceed?»...... Ayay ku tiri Balxan haweeneydii.

«Hooyaday, waxaa la yiraahdaa Xaliimo!»..... Wuxuu ugu jawaabay naagtii Bulxan.

«Xaliimo, ma hooyadaa baa?»...... Ayaa haweeneydii raacisay hadalkeedii.

«Haa, Xaliimo waa hooyaday.»...... Ayuu Bulxan uga war celiyey haweeneydii.

«Maandhe bal fariiso halkaan.»...... Ayaa haweeneydii ku tiri Bulxan.

Hilib oodkac ah, ayaa haweeneydii u soo bixisay Bulxan, caanana way ugu dartay intaas. Markii Bulxan wax cunay, ayuu iska ag fariistay haweeneydii. Galabtii ayaa ciddii waxaa u yimid nin rati rakuub ah ku jooga. Haweeneydii ayuu weydiiyey haddii ay aragtay wiil magiciisa la yiraahdo Bulxan. Haweeneydii waxay ku tiri inuu gurigeeda hurdo wiilkaasi. Ninkii rakuubka ku joogay Colaad, ayaa Bulxan rakuubkii ku qaaday.

Haweeneydii waxay u sheegtay Colaad in wiilku uunan aqoon u lahayn aabbihiis iyo xigtadiisa. Colaad, markii uu gaaray ciddiisii, ayuu ku carooday haweeneydiisii. Wuxuu ku canaantay inayan ahayn xilkas. Maalmo kaddib, ayaa ciddii waxaa yimid socoto u jeedda magaalada Gallaaddi. Galladdi waxay ka shishaysaa magaalada Gaalkacyo.

Bilo kaddib, ayaa fartiinu uga timid Bulxan aabbihiis. Fartiintiisa Jaamac wuxuu ku leeyahay in wiilkiisa loogu soo diro Gallaaddi. Jaamac markaas wuxuu joogaa Gallaaddi. Jaamac wuxuu ka soo guursaday tuulada Dhudub gabadh la yiraahdo «Mullaxo». Sidaas ayaa Bulxan looga waday tuulada Cadaado. Caddaado, ayaa looga daray Bulxan baabuur.

Waa markii ugu horreeyey oo uu Bulxan arkay baabuur. Baabuurku markuu habeynkii soconayo, Bulxan wuxuu ka heli jirey iftiinkiisa. Iftiinkaas markuu arkaba, wuxuu xusuusan jirey iftiinkii fallaaraha geedka qabada ah, markuu hurday. Bulxan iftiinka wuu jecel yahay, maxaa yeelay waxyaalo badan, ayuu ku arkaa. Baabuurkii Bulxan wuxuu geeyey Gallaaddi. Aabbihiis markuu kaga hor yimid meesha baabuurtu istaagto, ayuu aad iyo aad ugu farxay. Aabbihiis wuxuu u geeyey hooyo Mullaaxo. Hooyo Mullaaxo waa haweeney gaaban oo cas oo hadal badan.

Saygeeda iyo iyadu waa ilma-abti. Mullaaxo, waxay leedahay uur. Sidaas ayuu u noqday Bulxan wiilkeedii oo kale.

Sidaas ayadoo lagu jiro, ayaa Jaamac oo ciidanka duub cadda ah ka mid ah, loogu baddalay magaalada Wardheer. Intii muddo ah, haddii uu Jaamac ku noolaa Wardheer keli ahaan, ayuu xaaskiisii u soo cid dirsaday. Xaaskii ayaa sidaas ugu guuray Wardheer. Wardheer waa magaalo ciid guduud ah. Dadku wuxuu ka waraabsadaa xoolaha ceelasheeda dhaadheer. Iyadu waa magaalo ku taalla meel istrateejiya ah. Baabuurtii ka timaadda Muqdishow oo u socota Hargeysa iyo woqooyiga ayaa soo marta. Sidoo kale baabuurti Itoobiya u socota, ayaa sii marta. Jaamac waxaa laga qaaday Wardheer

1938, waxaana gumeystaha fashiistaha ahi u qaaday meelaha dagaalku ka socdo. Mullaaxo waxay markaas xaaska ku soo siyaadisey wiil. Wiilka magaciisa waxaa la yiraahdaa Geelle waana laba jir. Bulxan wuxuu ku farxay inuu helay walaal uu la ciyaaro. Bulxan iyo Geelle way wada ciyaari jireen, wayna is jeclaayeen. Mullaaxo waxay u roonayd wiilkeeda waana ay jeclayd. Bulxan markuu arko sida Mullaaxo wiilkeeda ay u dhaqaalayso, ayuu uurka ka guban jirey oo xusuusan jirey hooyadiis. Taasi isaga waxay ku kicin jirtey masayr iyo guhaad. Bulxan muunan tusi jirin hooyo-Mullaaxo qalbigiisa, maxaa yeelay iyadu marna may af garan karin. Hase yeeshee Mullaaxo waxay u malayn jirtey in wiilkeedu uu ka raganimo badan yahay iyo Bulxan inuu aad iyo aad uga caqli badan yahay. Bulxan qalbiga ayuu ka ooyaa, dadkana ma tuso inuu ooyayo. Cuntada Mullaaxo waxay ugu roonaataa wiilkeeda, inkastoo ayan cuntada si wacan u karin aqoon. Geelle hooyadiis sida ay yeelayso muunan jeclayn. Mar la arko wuxuu jeclaa inuu walaalkiis wax la cuno, oo isaga waxna aan gooni loogu qarin.

Hooyo-Mullaxo cuntada waxay ugu qarin jirtay Geelle aqalka dhigihiisa. Bulxan wuxuu yiqiin meelaha ay iyadu ku qariso cuntada. Marku gaajoodo, ayuu kala soo bixi jirey cuntada. Mullaaxo markii ay arrintaas ogaatay ayay sii karahday Bulxan. Waxay u malayn jirtey inuu bakhtiinayo wiilkeeda! Geelle hooyadiis taas lama uunan qabin oo wuxuu jeclaa inuu walaalkiis wax kasta la cuno oo la qaybsado. Maalin ayaa Bulxan oo gaajeysan gurigii yimid. Markaas ayuu guriga qaymadda ah dhigihiisa cad hilib ah kala soo baxay oo cunay. Markaas kaddib ayuu haddana xig yar oo caana geel ah dhamay. Isaga oo dhamaya, ayaa Hooyo-Mullaaxo soo gashay gurigii.

«Hoy, hoy! Bal daya! Isaga ayaa hilibkii cunay! Nejis yohow iiga bax gurigayga!» Hooyo-Mullaaxo ayaa ku tiri Bulxan.

Markuu intaas maqlay ayuu ka cararay hooyo-Mullaaxo. Bulxan dibedaha ayuu seexan jirey. Wuxuu ka biqi jirey hooyo-Mullaaxo. Hooyo-Mullaaxo weligeed sooma raadin jirin. Maqnaanta uu ka maqan yahay hoo-

yo-Mullaaxo, waxay u ahayd nabad iyo fayoobi. Dhawr beri markuu wax soo luflufto Bulxan, asii uu waayo wax wax siiya, ayuu guriga ku soo noqon jirey oo wax uu cuno ka daydayan jirey isaga. Waxaa dhacday in hooyo-Mullaaxo ay beddeshay meeshii ay cuntada ku qarin jirtey. Inkastaba guriga wax ku qarsoonaan karay may jirin. Isagu markii uu aad iyo aadba u gaajoodo, ayuu guriga wax ka xadi jirey.

Hooyo-Mullaaxo arriintaasi waxay ku noqotay arrin adag. Sidaa daraaddeed waxay bilawday inayan cunto guriga dhigan. Taasi markii ay dhacday, ayaa Bulxan walaalkiis Geelle u sheegay. Geelle arrintaas muunan garan karin, maxaa yeelay hooyadiis wuu jeclaa. Waxaa jirtey in Geelle mararka qaarkood uu dibedda ugu keeni jirey walaalkiis cuntada harta. Geelle maalin ayuu walaalkiis u soo xaday caano. Hooyo-Mullaaxo ayaa ku ogaatay arrintaas.

«War seegseeg yohow dhabqalallada ahi, maxaad cuntada u cuni weydey oo aad ugu geynaysaa sawirkii iyo habowgii! Hoogey, Hoogey oo ba'ay!»...... Hooyo-Mullaaxo ayaa wiilkeedii ku tiri. Intaas markay tiri hooyo-Mullaaxo, ayaa Geelle naxay oo iska fariistay oo madaxa gacmaha saartay. Arriintaasi markii ay dhacday, ayaa Bulxan gurigii ka tegay isaga oo iska shibban. Isagu magaalada ka gees iyo gees ayuu isaga tagaa. Magaalada Wardheer waa maagalo qurux badan oo carro guddudan leh. Markii roobku da'o, dhulkoo dammi wuu cagaartaa. Dhirtu way wada ubxisaa. Geeduhu markii ay ubxiyaan, Bulxan wuu ka baxaa magaalada oo wuxuu aadaa magaalada dibaddeeda oo harsadaa oo ku raaxaystaa udugga iyo carafta ka soo karaya geedahaas Bulxan kama baqo inuu ku jirrado miraha curdanka ah oo wuu iska cunaa.

Bulxan wuxuu qabaa cad qayd ah oo wasakh ah, oo hilfo leh. Isagu weli kabo ma qaadan, shaarna ma gashan. Gaajadu haddii ay aad u qabato, marmarka qaarkood isagu wuxuu cunaa xabagta geedaha ku taalla, siiba tan qaroonta iyo dhusundhusta. Bulxan waa inan dheer oo dhuuban. Gacmihiisu way godgodan yihiin. Taasna wuxuu ka raacay aabbihiis Jaamac. Timaha Bulxan waa

madow huruud ah oo aad mooddid in anqaas lagu bilbilay. Sanqaroorkiisu wuu dheer yahay, hoosna wuu ka weyn yahay. Bishimihiisu waa meel dhexe. Indhihiisu waa madmadow yayar oo god ku jira. Iyaga waxaa la moodaa in caad ku rogan yahay. Farihiisu way dhaadheer yihiin oo dhuudhuuban yihiin. Ciddiyihiisu way cadcad yihiin oo dhuudhuuban yihiin. Madaxiisu dhexda wuu ka fooraraa, geesahana wuu u weyn yahay. Bulxan waxaa ka muuqda mar kasta rajannimo iyo rafaad. Timihiisa ma firto oo iyagu mar kasta way taagtaagan yihiin. Madaxa waxaa kaga yaalla qolfo iyo xagtimo badan. Midabka Bulxan waa madow yustur ah. Lugihiisu waa dhaadheer yihiin, kubabkana way u dhuudhuuban yihiin. Faraha caguhu way dhaadheer yihiin. Dhagahiisu ma ballaarna ee way toostoosan yihiin. Ruugaggiisu way soo baxsan yihiin. Bulxan waa ilmaha aan hadalka badnayn oo iska shibban. Dadku waxay ku sheegaan inuu yahay nacas iyo doqon dhag weyn ah. Isaga waa la caayaa. Inta cayda waxaa u sii daran carruurta. Carrurta Bulxan lama ciyaaro mar walba. Wuxuu kala ciyaaraa inta ay cayaartu isugu baxdo. Carruuraha ay is le'eg yihiin Bulxan wuu iska celiyaa, haddiise uu arko mid ka xoog weyn, wuu ka baqaa. Bulxan inuu carruurta la dagaallamo muu jecla. Maxaa yeelay taasi waxay la tahay xumaan iyo khasaarto inkastoo carruurtu ayanogayn middaas. Wardheer waxaa laga jecel yahay carruurtii qaylo badan oo dagaalka jecel. Waqtiga ciyaarta Bulxan wuxuu aadaa meel magaalada ka fog oo uu ku ciyaaro.

Alaabta lagu ciyaaro weligiis Bulxan qofna ma siin. Sidaas daraaddeed isaga ayaa alaabta ciyaaraha samaysta. Alaabta ciyaaraha wuxuu ka samaystaa siligga iyo garangaraha fuustooyinka. Siligyada wuxuu ka samaystaa baabuurro. Baabuurrada siligyada uu ka samaysto, Bulxan aad iyo aad ayuu u jecel yahay! Baabuurta siligga ah, wuxuu dusha ka saaraa alaabo yaryar. Bulxan wuxuu jecel yahay inuu wax uun ku shuqlan yahay mar la arko. Inkastoo xilliyada intooda badani ay kulul yihiin, haddana isagu meel ma fariisto. Xilliga jiilaalka ah, Bulxan wuxuu ka baxaa magaalada. Miro uu cuno, ayuu doontaa. Miraha wuxuu u jecel yahay dha-

faruurta, hohobta, mira-caska, goosayga iyo gumushaaga. Intaas keliya ma ahee, isagu wuxuu aad iyo aad u yaqaannaa sida surta loo jabsado. Surta waaweyn muu jabsado, illowse wuxuu jabsadaa tan dhurdaha, maxaa yeelay tan dhurduhu way ka dhib yar tahay tan shinnida. Bulxan dabaasha wuu yaqaannaa. Gu la arko wuxuu ku dabaashaa balliga Gaafow oo Wardheer ku yaalla. Dabaasha aad iyo aad yuu u jecel yahay. Balliga Gaafow, waxaa ku ag yaalla ceel isna lagu dabaasho. Carruurtu way ka baqdaa ceelkaas, Bulxanse kama baqo oo intuu dusha istaago, ayuu isku tuuraa. Sidaas markuu yeelo, ayaa carruurtu wada qaylisaa oo naxdaa. Intii hal daqiiqo ayuu Bulxan biyaha quusaa, siduu carruurta uga sii nixiyo.

Markii qaarkood ay u maleeyaan inuu biyihii ku dhintay, ayuu dibedda u soo baxaa, isaga oo qoslaya biyuhuna ay labada can uga buuxaan. Markaas ayuu gantaal iyaga oo ah ka sii daayaa ilkihiisa sare oo fanaxda leh. Bulxan wuxuu leeyahay ilko qurqurxan oo fanax leh iyo cirrid madow. Isagu inyar ayuu qoslaa, haddiise uu u qoslo gabdhaha asaaggiis ah, iyaguna way u qoslaan. Nolosha Bulxan aad iyo aad ayay u dhib badan tahay. Biyaha haddii wax badan lagu jiro, gaajo ayaa carruurta qabata. Markaas ayaa inan iyo ina'n walba u noqdaan guryahooda. Bulxan isagu guri uu u noqdo ma leh.

Dibadda ayaa guri u ah. Makhaayadaha iyo dukaamada ayuu ku ag wareegaa. Cid wax siisaa ayuu doontaa, illowse wax wax siiya ma helo. Gaajadu Bulxan waxay ku qasabtay inuu makhaayadaha ka luflufto oo uu cuno lafaha iyo haraaga dadka. Wardheer makahayadaheeda waxaa laga sameeyaa bariis, hilib, maraq iyo digir. Makhaayadahaasi waxay ka samaysan yihiin qoryo iyo rammaali. Qoryahaas waxaa isu haya siligyo. Makhaayaduhu gadaal waxay ku leeyihiin jikooyin cuntada la dhigo. Bulxan inta makhaayadaha ah wuu wada yaqaannaa. Meel gacantu ay mari karto ayuu ka samaystay makhaayad walba. Habeynku markii uu soo galo, ayuu gacanta ka ritaa meelahaas oo dheriyada bariiska ah iyo kuwa digirta ah gacmihiisa ka buuxsadaa, markii wiilka makhaayadda ka shaqaynaya uu gaddoomo. Bul-

xan wuu yaqaannaa shaqaalaha makhaayadaha ka shaqeeya. Qaarkood waa kuwo aan laga lib heli karin. Iyagu dheryaha waxay afka ka saaraan dhagax weyn oo haddii laga qaado dheriga, uu qayliyo. Qaylada markii ay maqlaan, ayay durbaba ku soo noqdaan oo ku qayliyaan Bulxan. Qaarkoodna carruurtooda iyo xigaaladooda ayaa u ilaaliya Jikooyinka.

Bulxan sidii mar walba loo cayrinayey, ayuu halis galay inta la wada ogaaday. Xadidda cuntada ayuu damcay inuu iska daayo. Markaas ayuu u tegey nin makhaayad yar leh. Wuxuu warsaday inuu makhaayadda uga ilaaliyo carruurta tuugada ah. Ninkaas magaciisa waxaa la oran jirey Tahaliil. Bulxan wuxuu ula exaaday Tahaliil nin wanaagsan oo ka duwan kuwa kale oo makhaayadaha leh. Sidaas daraaddeed Bulxan wuxuu goostay inuu u tago Tahaliil oo shaqo warsado. Bulxan wuxuu doonayey oo keliya waxay ahaayeen shaqo uu cuntadiisa ku helo. Bulxan galab ayuu makhaayaddii Tahaliil soo galay.

«Adeer,...... Adeer,...... Adeer! Adeerow aan kuu shaqeeyo!...... Bulxan ayaa warsaday Tahaliil isagoo gariiraya.

Tahaliil intuu dhugtay Bulxan ayuu carooday oo yiri, «War yaa ciyaalka soo geliyey makhaayadda? War yaa soco dadka cuntada ha ku dhejin eh!»....... Tixdaas ayuu Tahaliil raaciyey hadalkiisii hore. Bulxan intaas markuu maqlay, ayuu ka qalbi jabay. Mar labaad ayuu Bulxan haddana baryay Tahaliil.

«Adeerow,...... Adeerow,...... Adeerow Tahaliil wax aan cuno ma haysto!»...... ayuu Bulxan ku yiri Thaaliil isago oo cod baqdinu ku jirto ku weydiisanaya naxariis. Tahaliil intuu istaagay, ayuu qayliyey.

«War ciyaalkaan yaa naga ceshada!...... Xaggee bay ilaaladii jirtaa!....... Iigu yeera Ilaalada!» Magaca ilaalada markuu Bulxan maqlay, ayuu booday oo cararay. Wiil makhaayadda ka shaqayn jirey, ayaa Bulxan ka soo daba orday oo doonayey inuu soo qabto. Bulxan aad iyo aad ayuu u orod dheeraa. Orod-dheerida keliya ma ahee, wuxuu yiqiin sida carruurta orodka loogu gooyo.

Wiilku wuu ka orod dheeraa isaga,wuuna ka cayilnaa. Markii wiilkii uu damcay inuu Bulxan ku dhago, ayuu Bulxan u gooyey. Meesha uu Bulxan ugu gooyey wiilka waxay u dhaweyd masaajidka Wardheer. Wiilkii wuu kufay oo dhacay.

Nabarro ayaa lugaha ka gaaray. Markaas ayuu inta jilibka qabsaday yiri, «Aa......, aa......, a......, lawgaygii ...... waa inoo tahay doofaar yohow, haddaanan kaa goyn, waad arki doontaa»...... Wiilkii ayaa guulguulay Bulxan. Bulxan wuu orod dheeraa maxaa yeelay tallaabadiisu way dheer tahay, jirkiisuna wuu dhuuban yahay. Waxaa jirtey habeyn uu aad u gaajaysnaa oo wuxuu cuno uu waayey. Isaga oo walwalsan, ayuu wuxuu arkay yaanyuur daadihinayaa beer ceeriin. Yaanyuurtii ayuu ka reebtay beerkii intuu ka daba orday oo dhagax ku tuuray. Markaas ayuu beerkii ku dubtay meel ka fog makhaayadaha. Magaalada Wardheer waxaa ku soo aroorta shan jid. Jid wuxuu ka yimaadaa Shiilaabo, midna wuxuu ka yimaadaa Qorrexey iyo Garloogubay. Midkalena wuxuu ka soo arooraa Walwaal, midka kalena wuxuu ka yimaadaa Gallaaddi, kan kalena wuxuu aadaa Jigjiga. Intaas oo jidad ah mid uunan ku socon Bulxan ma jiro. Wardheer aad iyo aad ayuu u jecel yahay Bulxan. Iyadu waxay leedahay hawo fayow iyo cir aan caad lahayn.

Roobku wuu ku yar yahay magaalada, illowse hadduu mar curto, wuxuu leeyahay dhibco waaweyn oo xoog leh. Taas keliya ma ahee, roobku markuu dhulka ku da'o neecow qabow ayuu leeyahay. Intaas waxaa u raaca saxansaxo udgoon. Bulxan wuxuu aad u jecel yahay qaanso-roobaadka. Markuu eegaba, wuxuu la yaabaa aragtideeda iyo quruxdeeda. Wardheer waxaa xilliga roobabowda laga abuuraa beero. Beerahaas waxaa ka baxa qare iyo digir. Bulxan wuu yaqaannaa inta beero ku yaalla magaalada Wardheer. Beerahaas waxaa lagu wareejiyey oodo qodax leh. Oodahaas qodxaha leh, Bulxan wuu ka boodaa oo soo goostaa qareyaal waaweyn. Qaraha Bulxan cunto uma qaato, maxaa yeelay dhammaantiis waa biyo oo gajo kama bi'iyo isaga. Inkastaba Bulxan xabxabka cascas wuu jecel yahay cuniddiisa, maxaa yeelay wuxuu qaboojiyaa qalbiga.

Maalmo ama bilo markuu ka maqnaado guriga, ayuu Bulxan soo raadiyaa walaalkiis Geelle. Markuu walaalkiis arko wuu ku farxaa aragtidiisa. Geelle iyo Bulxan way wada sheekaystaan. Geelle wuxuu ka baryaa walaalkiis inuu guriga soo seexdo oo uunan hooyo-Mullaaxo hadal-keeda waxba u qaadan. Taaxi waa wanaagsan tahay, illowse Bulxan wuu ka qalbi go'ay guriga. Bulxan ma-rarka qaarkood wuxuu arkaa askar ka timid aabbihiis. Jaamac sanooyin ayuu ka xarbiyey Itoobiya oo uunan war ka maqal xaaskiisa. Lacag ayuu bil walba soo diri jirey, ha yeeshee Bulxan taasi waxba uguma toornayn.

Sidaas isagoo Bulxan ku nool sanooyin, ayaa ma-gaalada Wardheer waxaa soo galay ciidan Ingriis ah. Talyaanigii Fashiistaha ahaa waa laga adkaaday oo waa la jebiyey. Markaas ayaa askartii xabbadi-keentayda ahayd soo noqotay.

Sidaas iyadoo la yahay ayaa dagaalkii labaad soo galay Wardheer. Dayuurado Talyaanigu leeyahay ayaa Wardheer dul guuxa. Bulxan dayuuradaha geed ayuu ka geli jirey. Dayuurado Ingriis ah, ayaa iyana soo weerari jirey magaalada. Markaasaa dadku ka qaxaa iyada. Sidaas iyadoo lagu jiro, ayaa askartii Talyaaniga oo Soomaalida ahayd ee la dhihi jirey Xabbadi-keentay qaarkeed ku soo noqotay Wardheer. Bulxan wuxuu maqlay in aabbihiis ku dhintay dagaalkii. Markuu askeri arkaba wuu qalbi xumaadaa. Wuxuu aad iyo aad u jeclaystay inuu mar keliya arko aabbihiis oo uga warramo rafaadka iyo silica uu ku nool yahay!. Bul-xan markii noloshi dibedda ahayd uu u dul qaadan waa-yey, ayuu hooyo-Mullaaxo ku soo noqday. Caydeedii iyo qayladeedii markaan dambe wuu u dul qaadan jirey.

Guriga waxaa joogay saddex riyood oo caanahooda shaaha lagu caddaysto. Bulxan riyahaas ayuu raaci ji-rey. Isagu muu jeclayn inuu ariga raaco, hase yeeshee, taasi sandulle ayay ku ahayd!

Maalin Bulxan isaga oo la jooga riyihii meel tog ah, ayaa riyu ka baxsatay. Hooyo-Mullaaxo markay ogaatey in ridii maqan tahay, ayay carootay oo si xun u cayday Bulxan. Markaas ayuu Bulxan gurigii isaga tegey. Ha-

beynkii markii gaajo qabatay, ayuu wuxuu cuno doontay. Makhaayadaha ayuu ku ag wareegay. Makhaayad ayuu soo ag istaagay oo dhugtay nin hilib cunaya. Ninka waxaa ag fadhiyey nin kale oo isna hilib ku cashaynayey.

Labadii nin way wada hadlayeen. Markaas ayaa mid hilibkii iska dhigay siduu midka kale ula sheekaysan lahaa inyar. Bulxanna intaas ishiisu waxay la jirta hilibka. Irridda makhaayadda ayuu inta isku dhejiyey ayuu ninkii ciid inta indhaha kaga dhuftay, ka qaatay hilibkii. Ninkii wuu naxay oo cawdubillaystay. Wuxuu yiri, «Balaaya kugu dhacday idam alla ma xunguruf baa!».

Habaarkii markuu maqlay ayuu cagaha wax ka dayey. Noloshiisii hore, ayuu ku noqday Bulxan. Isagu wuu og yahay in noloshani ay aad iyo aad u qallafsan tahay, ha yeeshee ay leedahay xornimo. Bulxan cayda haweenka aad buu u neceb yahay. Isagu dilidda ayuu dhaafsan lahaa cayda xun. Habeynadaas wuxuu seexan jirey masaajidka agahiisa. Habeyn ayaa qabow iyo roob badani yimaadeen. Markaasuu Bulxan galay masaajidka. Shiikh ku jirey masaajidka ayaa toosay oo ul kaga bixiyey guriga Ilaah lagu caabudo. Shiikii wuxuu ku yiri Bulxan.

«Xaaraan yahay ka bax beytul-laahiga!». Bulxan intuu carooday ayuu Shiikhii cundhuuf wajiga kaga tufay oo degdeg roobkii ugu baxay. Bulxan wuxuu necbaa wadaaddada Ilaahay carruurtiisa aan u arxami jirin!.

Inkastaba isagu wuxuu aad iyo aad u jeclaa masaajidkaas Masaajidka Wardheer minaaraddiisu way dheer tahay oo waxaa la moodaa inay cirka u dhawdahay. Markii laga baxo masaajidka, ayuu Bulxan fuuli jirey minaaraddiisa oo daawan jirey jidadka Wardheer soo gala. Minaaradda markii uu fuulo Bulxan, wuxuu baryi jirey Ilaah inuu ka bixiyo nolosha uu ku jiro. Bulxan sida loo tukado muunan aqoon, hase yeeshee wuxuu jeclaa inuu quraanka barto, siduu, wadaaddada u tuso inay xunxun yihiin oo jidkii Ilaah ka bayrsan yihiin. Habeynkii oo idil Bulxan fakar ayuunan la seexan jirin. Wuxuu ku fakari jirey sidii dadka Wardheer deggani ay u xunxun

yihiin iyo sidii ay u arxan beeleen. Wadaaddada salliga iyo ubbada wata, Bulxan wuu necbaan jirey, maxaa yeelay afkoodu weligiis dufan ayuu lahaa. Dufanka markii Bulxan ka uriyo amaba ku arko hilib iyaga oo sita, ayuu sii necbaan jirey!

Fakarkiisa Bulxan wuxuu ku ahaa keli ahaan. Qof uu la qaybsado fakarkiisa lama arag. Bulxan alaabada lagu ciyaaro, ayuu weheshan jirey. Dadku sidaas daraadded waxay moodi jireen inuu maahsan yahay oo uu yahay shibbane shaydaan. Bulxan wuxuu weydiin jirey dadka baabuurrada kaga yimaada magaalada Feer-feer, waxaa deggan hooyadiis. Markii aabbihiis Jaamac furay hooyadiis Xaliimo, ayay inta nin guursatay degtay Feer-feer. Xaliimo marna uguma imaan wiilkeeda Bulxan Wardheer. Isagu mar kasta uurka ayuu ku hayey inuu maalin arki doono hooyadiis. Faadumo waa Bulxan walaashiis. Iyadu way ka weyn tahay isaga oo waxay la joogtaa hooyadiis. Faadumo waa curaddii Jaamac iyo Xaliimo. Bulxan wuu og yahay in gabari la dhalatay magaceedana la yiraahdo Faadumo, hase yeeshee weligiis muu arag. Middaas keliya ma ahee, haddana Bulxan weligiis muu arag hooyadiis. Sida ay u eg tahayna muu yaqaanno.

Dadku Bulxan waxay u sheegaan in hooyadiis ay ka jaban tahay ilig ilkaha foolasha ka mid ah. Xaliimo ma taqaanno sida warqadaha loo qoro, haddii ay wiilkeeda u qori lahayd warqad. Bulxan markuu arko wiilashaasa aggiis ah oo hooyooyinka leh iyo sida ay u dhaqaaleeyaan ayuu qalbi xumaadaa. Wuxuu og yahay inay wiilashaasi ay ka wanaagsan yihiin isaga. Marmarka qaarkood hadduu arko wiil hooyadiis ay daanka ka dhunkanayso, wuu naxaa oo xumaadaa, maxaa yeelay Bulxan weligiis muu arag qof daanka ka dhunkada ama qof hadal qabow oo naxariis leh ku la hadlaya. Middaas iskaba daaye, dadku way caayaan isaga oo waxay ku sheegaan inuu nacas yahay!

Jeclaan hooyo markii uu ku welwelaba, Bulxan wuxuu sii necbaadaa hooyo-Mullaaxo. Galbata qaarkood Bulxan wuxuu tagaa xabaalaha. Xabaalaha agtooda ayuu inta iska fariisto, qodaa xabaal yar. Xabaashaas

yar oo uu qoday, wuxuu jeclaan lahaa in lagu aaso hooyo-Mullaaxo. Wax badan, ayuu Bulxan Ilaah ka beryey in hooyo-Mullaaxo ay dhimato.

Maalin ayaa Bulxan wiil la diriray. Wiilka magaciisa waxaa la dhihi jirey Yaasiin. Yaasiin wuxuu ahaa wiil aabi badan. Isagu carruurta wuu dili jirey inta uu ka weyn yahay. Bulxan si wanaagsan ayuu isaga celiyey Yaasiin intii tabartiisa ahayd, hase yeeshee markii uu rogtay oo uu damcay inuu si fiican u dilo, ayaa walaalkiis ka qabtay. Yaasiin Bulxan wuu ka xoog badnaa, Bulxanna Yaasiin wuu ka dabamaryo badnaa. Bulxan wax u hiilliya muu lahayn. Isagu wuxuu ahaa inan gooni ah. Adduunkiisa wuxuu ku ahaa gooni, fakarkiisa, noloshiisa, jeclaantiisa iyo necbaantiisa, wuxuu ku ahaa keli. Sidaas daraaddeed wuxuu u malayn jirey gooninnimadu inay dan u tahay. Bulxan jaallayaal badan muu lahayn. Jaallaha keliya oo uu leeyahay, wuxuu ahaa walaalkiis Geelle oo isna aan la qaybsan fakarka, jeclaanta, necbaanta, silica iyo rafaadka. Bulxan wuxuu ogaa in magaalada Wardheer uunan ku noolayn wiil isaga oo kale ah. Haddii uu ku noolaan lahaa wiil ku nool sida uu ku nool yahay oo kale, wuxuu ka dhigan lahaa jaalle wanaagsan. In badan ayuu doonay inuu jaallahaas oo kale helo, hase yeeshee jaallahaas muunan ka helin Wardheer.

Sidaas isaga oo ku nool Bulxan, ayaa dagaalkii labaad ee dunidu dhammaaday. Askartii xabbadi-keentayda ahayd. ayaa xoog u soo noqotay 1940. Askar ciidanka Ingriiska ka mid ah, ayaa ku soo noqotay Wardheer. Talyaanigii Fashiistaha ahaa, ayaa laga adkaaday oo la jebiyey. Dad badan oo dhaawac ah, ayaa kasoo noqday askartii Talyaaniga.

Baabuurro isku-tallaabu ku taallo ayaa guri jirey dhaawaca Ingriiska iyo kan Tayaaniga ah. Baabuurtaas hadda ka hor, ayuu Bulxan arkay. Isagu markii uu arkaba baabuur isku-tallaabi ku dhigan tahay, wuu ka carari jirey. Dadku waxay sheegi jireen in gaaladu ay dadka dhiigga ka miirato oo ay tahay dadqalato. Sidaas daraaddeed ayuu Bulxan ka biqi jirey gaalada oo dhan. Bulxan noloshii markii ay ku sii xumaatay, ayuu hooyo-

Mullaaxo ku soo noqday mar labaad. Hooyo-Mullaaxo, arigii ayay haddana raacisay isaga. Bulxan markaan dambe riyihii sida aynan uga lumin, ayuu dhammaantood wada xirxiray. Wuxuu ku xirxiray meel naq leh. Dhulku markaas roob ayuu lahaa. Riyaha xargaha ayuu u dheereeyey, sidii ay u daaqi lahaayeen. Intaas markuu sameeyey, ayuu iska seexday. Riyihii mid ka mid ah, ayaa furatay oo arya kale raacday. Bulxan ayaa toosay. Markaas ayuu wuxuu arkay in riyu maqan tahay. Markaas ayuu raadiyey ridii. Wuxuu ka helay ari kale iyada oo la daaqaysa. Isaga oo ridii u soo wada riyihii kale, ayuu wuxuu ka arkay meel fog qof soo socda oo af duuban. Bulxan intuu istaagay, ayuu dhugtay qofka ku soo socda. Isagu wuxuu u maleeyey in qofkaasi uu yahay aabbihiis. Qofkii markuu ku soo dhawaaday, ayuu haddana qalbiga ka sii kacay. Qofku wuxuu ku hullaabnaa maro go' ah. Gadaalna wuxuu ku watay wax. Intii qofku uu ku soo socdey, Bulxan meeshiisii kama dhaqaaqin ee wuxuu ku dhaygagsanaa qofka. Xusuus fog ayaa isaga ku dhalatay. Qofkii ayaa markii danbe soo ag joogsadey. Qofku wuxuu ahaa aabihiis Jaamac. Jaamac xusuustiisu way yaraatay oo wuu garan waayey wiilkiisii. Qofka dagaalke ka soo noqda xusuustiisu way yaraataa. Jaamac wuxuu ka warsaday wiilkiisii rajayga ahaa xaaskiisii intii kale. Bulxan intii uu u warramayey aabbihiis, waxaa ka dililiq lahayd ilmo waaweyn. Jaamac markuu arkay wiilkiisa abaarta ka muuqata, ayuu isna ilmo ku soo joogjoogsatey.

«Maandhe! Mar danbe ku cidlayn maayo ee iska aamus!»...... Jaamac ayaa willkiisii ku sabaaliyey. «Wax badan ayaan ku sugayey inaad soo noqoto aabbe!» Ayaa Bulxan aabbihiis ugu jawaabey. Bulxan maalintaasu waxay u ahayd maalin weyn oo aan la halmaami karin. Si uunan weligiis u farxin, ayuu Bulxan maalintaas u farxay. Adduunkii la madoobaa ayaa u iftiimay isaga. Dhulkii la abaarta ahaa ayaa doog la yeeshay Bulxan. Niyadii la culusayd, ayaa u fududaatay. Taagdarridiisii ayaa xoog u baddalantey. Ciilkii iyo guhaaddiisii ayaa jeclaan u baddelmay. Wejigiisii kaduudnaa ayaa furturtay.

Jaamac gurigii ayuu u siidhaafay Bulxan isaga oo qori lixle ah wata. Gurigii ayuu maalintii o dhan iska hurday isaga oo aan qofna war u celin, salaan wax ka weyn. Fiidkii ayaa Bulxan riyihii soo hooyey. Habeynkaas Bulxan aad iyo aad ayuu wax u cunay. Aabbihiis ayaa makhaayadaha inta geeyey hilib ka siiyey.

Makhaayadahii uunan Bulxan fariisan weligiis, ayuu kala qadeeyey aabbihiis, sidii wiil sharaf leh. Wiilasha makhaayadda ka shaqeeya, ayuu Bulxan ku qayliyey inay wax ka gataan! Shaaqigii makhaayadda, ayuu wuxuu ku yiri,

«War shaaqigii meeyey! Hilib baruur leh oo feera ah ii keen waryaa oo iga celi misigtaan. Yaa ku yiri, miskaha ayuu cunaa! Maxaad iigu keentay misigtaan?......

Bulxan ayaa ku yiri eraaydaan wiilka makhaayadda ka shaqeeya. Hilibkii markii uu u cunay sidii dhurwaa oo kale, ayuu Bulxan warsaday wiilkii inuu u keeno faraxal iyo tirtire. Jaamac ayaa wilkiisii weydiiyey, inay gaajoo weli hayso, iyo in kale. Bulxan wuxuu ka xishooday inuu hilib kale ku ceshado, inkastoo uunan u dhergin sidii uu jeclaa. Wiilkii makhaayadda ka shaqeynayey, ayaa si xun u eegay Bulxan. Intuu soo ag maray, ayuu Bulxan ku yiri,

«Xaggee baan kugu arki jirey!»......

«Xaggee baan kugu arki jirey!...... Xaggee baan kugu arki jirey! Maxay tahay!»...... Ayaa Bulxan uga jawaabay wiilkii makhaayadda ka shaqayn jirey, isaga oo af jigaya.

«Waryaa shaqaalow shaqayso oo shaah iyo caano ii keen!»...... Bulxan ayaa ku yiri shaqaalihii.

«Waa Hagaag...... waa hagaag walaal...... waa hagaag walaal!»...... Ayuu shaqaalihii ugu jawaabey Bulxan. Bulxan weligiis erayadaas oo kale kama uunan maqlin willlasha makhaayadaha ka shaqeeya. Iyagu waagii hore, sidii tuug oo kale ayay u cayrin jireen.

Maanta ma cayrin karaan, maxaa yeelay wuxuu la jiraa aabbihiis. Intaas keliya ma ahee, iyagu waxay jecel yihiin lacagta. Tuug haddii uu lacag leeyahay, wii-

lasha makhaayaddu way jecel yihiin. Waxay ka doonaan inuu siiyo xaqal-shaah.

Jaamac wuxuu dagaalkii Fashiistaha Talyaaniga kala soo noqday lacag. Lacagtii wuxuu ku gatay dukaan. Dukaankii wuxuu dhigay dhar iyo cunto. Bulxan dukaanka ayaa la geeyey. Halkaas ayaa loo dhigay derin uu ku seexdo.

Bulxan noloshiisii way is beddeshey. Cunto iyo duggaal ayuu helay. Dukaanku Bulxan wuxuu u noqday guri oo kale. Intii laba sano ah, ayuu Bulxan nolol ka wanaagsan tii hore, ku noolaa. Jaamac miyiga waxaa u jira geel. Geela waxaa haya walaalihiis, lo'duna way ku yar tahay. Geelu hadba wuxuu u soo arooraa Wardheer. Jaamac walaalihiis waxay u soo jeediyeen in Bulxan miyiga loo soo diro oo uu xoolaha wax ka dhaqo. Jaamac wuxuu ka yeelay iyaga arrintaas. Jamaac waxaa dhib ku noqotay sidii uu mar la arko u ilaalin lahaa Bulxan. Bulxan iyo aayadiis mar la arko way isku qayliyaan oo diriraan. Hooyo-Mullaaxo, waxay dhib ka mudatay ilaaqda iyo dacwada wiilka ay aayada u tahay. Jaamac middaasi wax dhib badan ayay ku noqotay. Isagu wuxuu mar keliya doonay inuu Bulxan iyo-Mullaaxo kala dheereeyo. Sidaas daraaddeed ayuu wuxuu goostay inuu Bulxan u diro Walaalihiis.

Geelii walaalihiis ayaa u soo arooray Wardheer maalin. Bulxan sidaasaa geelii loogu daray. Xilligu wuxuu ahaa jiilaal. Geela reer Jaamac waxaa ka irmaanaa laba halaad. Hal waxaa la dhihi jirey Mareeg. Iyadu waa hal gaaban oo madow oo caano badan leh. Mareeg waxay wadataa nirig. Hasha kale waxaa la oran jirey Saakin. Iyadu waxay ahayd hal dheer oo midab baroor ah leh. Saakin aad iyo aad ayay u buurnayd, wayna rimmanayd. Mareeg caanaheeda laba ama saddex qof ayay ku filnaayeen. Bulxan xig yar oo caana ah, ayuu ka dhami jirey, inta kalena wuxuu u dayn jirey carruurta kale. Sida la og yahay qofku hadduu wax badan ku noolaan jirey magaalo, caanaha geela marka hore wuu ku jirradaa, calooshana wuu ka baxaa. Markii uu Bulxan ku jirradey caanihii geela, ayuu caana diidey. Carruurtii kale ayaa iska maali jirtey Mareeg. Middaas keliya ma ahee, iyagu

waxay hasha ka marin jireen caanaha oo dhan. Nirigtana waxba uma ay reebi jirin. Bulxan middaas wuu ka carooday. Wuxuu ogaadey in Mareeg habeynkii la mirto. Si aan loo miran hasha, isagu habeynkii oo idil wuu soo jeedi jirey. Habeyn ayuu wuxuu ku qabtay laba wiil oo doonaya inay hasha mirtaan. Markaas ayuu ku qayliyey. Subaxdii ayuu ka eed sheegtay in hashiisa laga maalo markuu hurdo. Taas wax uga garaaba muu helin. Carruurta geelleyda ahi, isma ay xaq dhawrto. Bulxan wiilasha midkii ugu shidda badnaa, ayuu la diriray. Bulxan legdanka muu yaqaanno, wuxuuse yaqaannaa sida carruurta loogu gooyo iyo dabamaryada. Markii ay Bulxan willkii is qabsadeen, ayaa Bulxan la legdey oo dhulka dibir xun lagula tuuray. Bulxan wuu wareeray. In yar kaddib, ayuu dhulka ka kacay, intuu ciiddii iska tirtiray. Legdenka waxaa fiirsanayey wiilal kale oo ku qosqoslayey Bulxan. Geelleydu waxay qabaan in wiilka reer magaalka ahi, uu ka xoog yar yahay wiilka reer miyiga ah. Bulxan intuu carooday, ayuu wiilkii dharbaaxo ku qaaday. Wiilkii kale ayaa isna dagaal u guntaday. Labadoodii ayaa markaas dharbaaxooyin isku dhufdhuftay. Markaas ayaa geelleydii kale kala qabatay wiilashii. Waxaa la yiri, «Dab aan kulaylkiisa la arag, dambaskiisa lagama leexdo». Sidaasaa wiilkii shiddada badnaa ku nabad geliyey Bulxan, hashiisiina uunan mar dambe uga maalin. Caanaha intuu cabbo mooyee, inta kale wuxuu u reebi jirey qofkuu doono iyo nirigta. Geelleydii waxay ku karheen Bulxan ilaalinta Mareeg habeynkii. Habeyn isaga oo meel hurda, ayaa wiilkii shiddada badnaa gaaday oo kaadi geel ku sayryasray. Markaas ayaa Bulxan inta booday, ayuu wiilkii qaniinyo ku dhegay gacanta. Wiilkii ayaa cabaaday oo wuxuu hiil ugu yeertay walaalkiis. Walaalkiis ayaa inta istaagay Bulxan dharbaaxo ku dhuftay. Markaas ayuu dhulka ku dhacay. Dhulka isaga oo yaalla Bulxan, ayuu walaalkii weynaa cagta ka qaniinay. Dubbad markaas ayuu si xun Bulxan u jilciyey oo ku tuntuntay. Laba feerood ayuu Dubbad ka jebiyey Bulxan. Dubbad geela isaga ayaa u madax ah. Carruurtoo dhammina way ka baqdaa isaga. Habeynkii oo idil ayuu Bulxan ooyayey. Qofna uma soo hiillin. Ciil iyo qamuunyo ayuu habeynkaas la seexday Bulxan. Mar la

arko wuxuu ku fakari jirey, sidii uu uga aargudan lahaa Dubbad. Dubbad middaas wuu ku ogaa Bulxan oo wuu iska dhawri jirey. Bulxan wuxuu helay maalin toorrey aflà. Toorreydii ayuu qarsaday. Markii uu seexday Dubbad, ayuu la soo kor istaagey toorreydii.

Markaas ayuu kaga dhuftay Dubbad garabka midigeed. Bulxan wuxuu doonayey, inuu Dubbad wadnaha kaga dhufto toorreyda, illowse taasi way u ahaan weydey. Markaasaa Dubbad intuu dhulka dhigtay Bulxan ku sii tuntay, ilaa intii uu afka ka keeno dhiig. Dadkii kale ayaa ku toosay qayladoodii iyo oohintii Bulxan. Carruurtii dhammaanteed waxay ku gar naqeen in Bulxan gardarrada uu lahaa. Bulxan markaas ayuu ogaaday, miyiga inaan nololi u oollin. Intuu iska aamusay ayuu ku tashaday, inuu ku haro Wardheer kalka soo socda, markii geelu u arooro. Wardheer markuu yimid geelii oo ka wabxay, ayay wiilashii Jaamac u yimaadeen. Badi wiilasha, Jaamac wuxuu u yahay adeer. Arrintii dhacday, ayay si xun ugu sheegeen Jaamac. Markaas ayaa Jaamac rumaystay hadalkoodii oo sii canaantay Bulxan. Bulxan si wacan ayuu isu daafacay, illowse biyo kaa badani iyo rag kaa badaniba way ku hafiyaan. Hadalkiisii waalidkiisii muunan rumaysan. Galabtii geelii markii uu soofay, ayaa Bulxan ka dhuuntay. Ceelasha meel u dhow ayuu iska seexday. Wiil yaa magaaladii ku soo noqday oo u sheegay Jaamac, in Bulxan uu ka dhuuntay geelii. Maalintaas oo dhammi Bulxan wuxuu ku fakarayey sidii uu ciil uga bixi lahaa. Talo waxay kaga go'day, inuu cilmiga raacdo oo uu iska daayo miyiga noloshiisa. Arrintaas qura, yuu u maleeyey, inay ciil tiri karto!

Ceel isaga oo hurda Bulxan, ayaa aabbihiis Jaamac soo kor istaagay. Gacmaha ayuu inta qabtay oo lugaha ku dhegay, ayuu ceelkii u laalaadiyey. Bulxan markaas ayuu aad iyo aad u naxay.

«Miyi ma aadaysaa oo geelii ma raacaysaa?»........ Ayuu Jaamac ciil ku yiri.

«Maya aabbe, geelii raaci maayo!...... Ayuu Bulxan ugu jawaabey aabbihiis.

«Haddaadan miyi u raacin geela, ceelka ayaan kugu ridi doonaa!...... Jaamac ayaa ku yiri Bulxan.

«Haddaad doontid igu rid ceelka, waxaanse kuu sheegayaa inaanan miyi mar danbe tegeyn.»...... Bulxan ayaa ugu jawaabey aabbihiis.

«Anigu waxaan doonayaa inaan cilmi raacdo!......» Bulxan baa ku adkaystay dhihidda tixdaas. Jaamac intaas markuu ka maqlay wiilkiisii, ayuu naxay oo sika sii daayey.

Sidaas ayaa Bulxan lagu geeyey dugsi. Wardheer waxaa ku yaalla dugsi wanaagsan. Dugsigaas waxaa dhiga macallin wanaagsan oo magaciisa la yiraahdo macallin-Daahir. Macallinku si wanaagsan ayuu ardada wax u baraa. Ardada waxaa laga bixiyaa lacag la yiraahdo fariisin. Bil walbana waxaa laga siiyaa macallinka lacag. Saddexdii biloodna wiilkasta waxa laga dhiibaa dago. Sidaas ayaa macallinku ugu dhigaa ardada quraanka. Arday waliba waa inuu leeyahay loox uu quraanka ku qorto iyo anqaas uu wax ku dhigto. Habeynkii ardadu waxay seexataa dugsiga, hurdadana waxay ka kacaan saddex saac oo habeynimo. Dab weyn ayaa la shidaa oo quraanka lagu akhristaa. Hurdada ardaygii ka kici waaya ul ayaa looga kiciyaa. Dugsiga waxaa yaalla ulo dhengedo ah oo ardada lagu uleeyo.

Dhengeduhu ma jabaan oo way jiljilicsan yihiin. Dhengedahaas waxa laga soo gooyaa geedaha hohobta ah, dhafaruurta ama miracaska. Macallinku markii wiil gafo Aalad Quraan ah ayuu la dhacaa dhengedahaas. Iyagu waxay ku dhegaan oogada ardada oo si xun ayay u xanuujiyaan. Arday kasta oo adkaysan badaniba wuu ooyaa. Ardadu waxay leedahay kuwo hurdada isku adkeeya. Markay hurdada isku adkeeyaan, ayuu macallinku u diraa arday ul wata. Markaas ayuu ardaygu la dhacaa, inta hurdada ku harta. Ardadu middaas xeel ayay u samaysatay. Maryahooda malaykaanta ah, ayay ku togtogaan oogadooda sidii ayan ushu u karteen. Ardada hurudda markii ushu ku dhacdo, waxaa ka yeera «Bow......bow......bow......». Bulxan isagu mar la arko wuu feejigan yahay oo macallinka wuu iska ilaaliyaa. Sidaas daraadded macallinku muu dilo. Bulxan quraanka si wanaagsan ayuu u bartaa oo dusha ayuu ka qabtaa cashar walba. Isagu wuxuu leeyahay fahmo weyn oo ma-

callinku ka yaabay. Sidaasaa macallinkii ku jeclaaday Bulxan. Bulxan aad iyo aad wuxuu u og yahay meel uu ku laabto inayan kaga danbayn adduunka. Sidaas daraaddeed ayuu ku dhegey quraankii. Middaas keliya ma ahee, ardadii oo dhan ayaa Bulxan jeclaatay. Sidoo kale ayuu aabbihiisna u jeclaaday. Jamce kasta ardadu waxay leedahay fasax. Ardadu roob markuu da'o waxay ku dabaalataa balliga Gaafow. Hase yeeshee maalin ayaa arday ku haftay balliga. Markaas ayaa macallinku reebay in lagu dabaasho balligaas. Inkastoo macallinku reebay in lagu dabaasho balliga, haddana way u dhuuman jirtey ardadu dabaasha. Markii macallinku weydiiyo qofkii ku soo dabaashay balliga, iyagu way dafiri jireen. Sidaasaa macallinku ardada dhexdeeda ku yeeshay basaasyo. Basaasyada waxaa la siin jirey laaluush. Ardaygii aan bixin laaluush, basaasyadu way sheegi jireen. Inkastaba macallinku wuxuu ogaaday inaan sirta ardata loogu keenin, siduu u jeclaa. Isagu wuxuu ogaaday in ardadu ay laaluush kala qaadato. Bulxan isagu laaluush ma qaato mana siiyo cidna. Macallinkii markuu ogaaday in ardadu laaluush kala qaadato, ayuu xeel kale keenay. Taasi waxay ahayd in ardada uu ka uriyo oogadooda biyaha balliga. Biyaha balligu waxay jeexjeexaan oogada dadka haddii wax badan lagu dabaasho. Middaas keliya ma ahee, biyuhu haddana waxay dadka u yeelaan qaajeer haddii wax badan dabaashooda lagu noqnoqdo. Taasi waxay ifisay dhagarti ardada. Carruur badan ayaa sidaas lagu diley. Markaas ayaa ardadii iyana xeel kale ku keentay macallinkii. Xeeshu waxay ahayd markii ardadu ay biyaha ku soo dabaalato wax badan inay subag ama xayr is mariso. Arrintaas waxa ku kacay wiil la yiraahdo Cabdi. Cabdi wuxuu ahaa will dhagar badan. Macallinka ayaa isaga maalin u yeeray.

«Cabdi! oogadaada bal keen aan uriyee!...... Macallinkii ayaa warsaday Cabdi.

«Waa tan macallin!»......Cabdi ayaa soo ag istaagay macallinkii. Macallinkii ayaa markaas ursaday oogadiisii, inta sanka saarsaaray.

«War belo qabe, maxaa oogadaada ka uraya?» ........ Macallinkii ayaa yiri.

«Macallin! Waa subag!».......Ayaa Cabdi yiri.

«Ma waxaan baa subag ah!»....... Ayaa macallinkii haddana Cabdi Weydiiyey.

«Haa, macallin waa xayr!»....... Ayuu wiilkii ugu jawaabey isaga oo naxsan.

«Uf..... uf..... uf..... belo qabe iga ag dhaqaaq!»..... Macallinkii ayaa ku yiri Cabdi isaga oo yaqyaqsanaya. Sidaas ayay ardadii macallinkii uga xeel badisay. Arday danbe laguma ogaan karin, inuu biyaha ku soo dabaashay iyo in kale.

Bulxan laba sano markuu dugsigii dhiganayey, ayaa macallinkii iyo ardadii oo idilu ay wada jeclaadeen. Wuxuu noqday ardada midka ugu fahmo badan iyo kan ugu xusuus dheer. Macallinku goobo badan ayuu ka sheegay dadaalka Bulxan, sidaas daraaddeed ayuu magaaladii oo dhan ku noqday caan. Waayihii hore haddii la caayi jirey Bulxan, hadda waa la faaniyaa. Ardada oo idilu way xurmaysaa Bulxan. Isagu wuxuu sidaas ku noqday arday xurmo leh. Dabadeed wuxuu noqday Kabiir. Kabiirku waxaa weeye ardayga kaaliya macallinka. Isagu wuxuu wax dhigaa markii macallinku maqan yahay.

Jaamac markii uu ogaadey in wiilkiisu ugu sito wiilasha, ayuu ku farxay taladiisi ahayd in wiilkiisa uu quraanka iyo cilmiga u dhigo. Hooyo-Mullaaxo arrintaas kuma ay farxin. Iyadu way ka naxday libinta weyn oo uu gaaray wiilkii ay dhihi jirtey «waa nacas iyo dhabqalallo» Hooyo-Mullaaxo arrintasi way la culusaatay, masayrna way ku riddey. Iyadu libinta iyo sharafta Bulxan helay, way u xasdeysey. Wiilkeedii ayay maalin canaanatay oo ay ku dhiirri gelisey, inuu wax u barto sida Bulxan wax u baranayo. Sidaas ayaa Geelle lagu geliyey dugsigii isna.

Geelle, waxaa ku dhashay xoogaa tartan ah. Bulxan kama uu xumaan, markii uu ku arkay walaalkiis inuu la tartamayo. Isagu wuxuu jeclaa inuu walaalkiis wax barto. Bulxan walaalkiis, wuxuu bilaabay inuu aad iyo aad wax u barto. Geelle dadaal weyn ayuu la yimid. Sida walaalkiis Bulxan, ayuu Geelle doonay inuu cilmi barto, maxaa yeelay wuxuu ogaa niyada walaalkiis Bul-

xan. Sidaas ayuu Bulxan ku jirey afar sano. Qurrankii ayuu si liibaan ah ku dhammeeyey.

Intii uu Kabiirka ahaa, wuxuu caawimi jirey macallinkiisa. Bulxan wuxuu jeclaa inuu nolosha dugsiga uu beddelo. Nolosha dugsigu aad iyo aad bay u qallafsanayd.. Ardadu waxay seexan jirtey dugsiga. Dugsiga waxaa ka dhashay gujis (dixiri).

Gujisku wuxuu ka dhashay ardada isku kaadisa, markii ay habeynkii huruddo. Ardadu haddana waxay keeni jirtey bun. Bun waxa u keena ardaygii Jus quraan ah dhammeeya. Bunku waa haruur subag leh oo ardada faraqa loogu shubshubo. Ardada macallinku wuu u diidaa nadaafadda iyo hufnaanta. Ardaygu waa inuu adduunyada quruxdeeda ka tagaa oo naftiisa u huraa barashada quranka! Taasi waa filasoofiyada macallinka dugsigu rumaysnaa. Ardada qaar ayaa macallinka la diriri jirey. Markaas ayuu macallinku si xun u dili jirey. Macallinku dhaawac halis ah, hadduu arday gaarsiiyo, waa inaan macallinka loo sheegan. Oday waliba markuu wiilkiisa keenayo dugsiga, wuxuu macallinka ku yiraahdaa «Willkayga jirkiisa adaa leh, anna waxaan leeyahay naftiisa!». Macallinka filasoofiyada uu middaas haddana ka rumaysan yahay, waxay ahayd hadalkii Khaliifadii Labaad ee Islaamka, Cumar Bin-ul-Khaddaab uu yiri, «Ninkii xaraf ii kordhiya, addoonna waa u noqon lahaa», Sidaas daraaddeed macallinku siduu doono, ayuu ardayda ka yeelaa. Macallinku ardada wuu u duubaa. Isagu ardada qaarkeed wuu necbaa. Markuu dilo, ayay ka carari jireen. Qaarkeed waxay u carari jireen miyiga. Marka Macallinku waa inuu raadiyaa oo soo celiyaa, taasina macallinka waxay ku ahayd sandulle, inuu sidaas yeelo, sida xeerka waalidyada iyo macallinka u dhexeeyaa uu leeyahay. Maalin ayaa waxaa miyiga u fakaday wiil arday ah oo la yiraahdo Axmed. Axmed wuxuu ahaa wiil wax barashada neceb. Ayeydiis oo miyiga u dhow Wardheer joogta, ayuu u fakaday. Macallinka iyo Bulxan iyo Raage, ayaa u doonay wiilkaas, miyiga. Wardheer ayay ka tageen. Maalin iyo habeyn ayay socdeen. Aroortii danbe, ayay u yimaadeen cid ari leh. Ciddii markii ay u tageen ayaa duq lixdan-jir ahi ka

soo hor baxday. Duqdaasi waxay ahayd Axmed ayeydiis. Isaguna wuxuu ku taagnaa miscilisha ariga oo wuxuu lahaa; «Ayeeyo ridee baan soo qabtaa?» Axmed markii uu iyaga arkay ayuu naxay oo ka soo degay miscilishii. Isaga oon hadal celin, ayuu sidii jiir la qabtay agtooda soo fariistay. Macallinkii ayaa duqdii u sheegay, inay doonayaan Axmed. Duqdii way oggolaatay in Axmed iyaga u raaco magaaladii.

Maalintu aad ayay u kululayd. Xilligu wuxuu ahaa dayr. Dhirta iyo geeduhuba way birbirqayeen. Dhulkuna wuu qoyanaa, saxansaxana way ka ureysey. Hohobta, dhafaruurta, miracaska, gumashaaga iyo ciidkaba waxaa ku yiillay miro gahayr ah. Ubuxu wuxuu ka soo kankamayey lebiga iyo hareeriga. Shinbiruhu way heesayeen. Shinnida iyo dhurduhuba waxay fuulfuulayeen ubaxa iyo magoolka. Geedaha waaweyni waxay lahaayeen hoos harac ah. Bulxan marku geedaha eegaba, waxaa qaban jirtey hurdo.

Isagu wuxuu iska jeclaa inuu iskaga haro miyiga oo uu geedahaas fuulfuulo oo uu ka nasto inyar dhibta iyo qaxarkii uu ku noolaa. Shinbiraha heesayey waxaa ka mid ahaa qudunquuto, guddoonle, qoolley, cirsankayeer, guuguule, dhawdhawley iyo buri. Cirku wuxuu lahaa saymo. Fallaaraha qorraxdu waxay ku soo aroorayeen geedaha korkooda, markaas ayay qurux u kordhinayeen caleemaha geedaha haraca ah. Madaxyo roob ah, ayaa meel walba ka muuqdey. Neecaw qabow ayaa hadba gees ka timaadda, markaas ayay daftaa kulka dayrta. Bulxan aad iyo aad ayuu abuurta u jecel yahay. Dhulka quruxdiisa markuu sii eegaba, Bulxan waxaa qabta hilow. Isagu wuxuu xusuustaa geedihii uu miraha ka guran jirey iyo kuwii uu hoos seexan jirey. Saacaddu markii ay ahayd halkii, ayaa duqdii u keentay soor. Soortu way kululayd. Macallinku muu jeclayn soorta kulul. Soorta waxaa lagu iidaamay caano ari. Markii ay u fariisteen soortii, ayaa duqdii soo ag fariisatay oo sheeko macallinkii u qabatay. Soorta waxaa loo sameeyey macallinka, Bulxan iyo Raage. Axmed isagu lama cunayn iyaga soorta. Macallinku wuxuu leeyahay faro jijilicsan. Isagu salaadda ayuu aad u tukadaa, sidaasaa calaacalihiisu

u cascasaayeen oo dhiiggu ugu soo joogjoogsan jirey. Raage waa arday hunguri weyn. Isagu wuxuu cuntada ka boobaa dadka. Maalintaas Raage si xun ayuu u gaajaysnaa. Xeerada soorta ahi, iyaga way dhex tiilley. Macallinku hadba intuu cad soor ah qaato, ayuu sheekada la wadey duqda. Raage cadkii soor ah oo macallinku meel saarto sidii uu u qabowsan lahaa ayuu ka qaataa. Macallinku waa nin xishooda oo haweenka ka cabsada. Markuu arkay in Raage uu ka qaadanyo cadkuu hadba meel saarto, ayuu ciil ugu dhintay Raage. Macallinku Raage isha ayuu aad ugu gubaa, sidii uu edebdarrada isaga deyn lahaa. Hase yeeshee Rage arrintaas waxba uma uu qaadan, maxaa yeelay gaajo xun ayaa haysey. Bulxan iyo duqduba way arkeen in Raage uunan waxba u reebeyn macallinka. Iyagu way iska aamuseen. Macallinku maalintaas wuu qaday oo waxba cuntadii yarayd kuma tarin. Galabti ayay ciddii ka soo ambabaxeen. Axmed wuu la socdey iyaga. Macallinku wuxuu sitey masalle, ubbo, kaba-soomaali iyo kitaabbo culculus.

Intaas oo dhan waxaa lagu raray Axmed. Isagu waa arday labo iyo toban jir ah. Midabkiisu wuu madow yahay. Waa wiil gaaban oo maarriin ah. Indhihiisu waxay ku jiraan god, timihiisuna way adag yihiin. Macallinkii wuxuu amray Bulxan, inuu soo jaro dhengedo lala dhaco Axmed. Bulxan wuu yeelay sidii macallinku faray. Macallinkii ulahii wuxuu ku idleeyey Raage oogadiisa. Raage waxaa ka dhammaaday cabaadkii iyo oohintii. Ulokale ayaa macallinkii haddana u diray Bulxan. Markaas ayuu soo jaray kowo curdan ah.

Axmed ayuu macallinkii ku baabi'iyey ulahii oo dhan. Macallinku maalintaas oo dhan labadii arday, ayuu garaacayey. Bulxan isna wuu ka baqay macallinka, hase yeeshee muu dilin. Alaabtii culculusayd lagama nasin Axemd. Habeyn iyo maalin ayuu dusha ku wadey Axmed alaabtii macallinka. Bulxan ayaa markuu arkay dhibaatada uu ku jiro Axmed, ayuu damcay, inuu alaabta ka nasiyo oo u naxariisto, hase yeeshee taas macallinkii ayaa diidey. Habeynkii danbe, ayay soo galeen magaaladii Wardheer. Raage ayaa aabbihiis u sheegay, in macallinku ku diley cunto uu ka boobay. Hase yeeshee aabbihiis kama uunan garaysan wiilkiisii hadalkii uu u shee-

gay. Toddoba maalmood kaddib, ayaa Raage dugsigii ka fakaday. Magaaladii oo dhan, ayaa ardadii ka eegtay, illowse lama helin. Niman socoto ah, ayaa ku sheegay wiil tuulada Walwaal. Markaas ayaa macallinkii u diray Bulxan iyo saddex arday oo kale. Walwaali way u dhowdahay Wardheer. Bulxan iyo ardadiisii way soo heleen Raage. Xoog iyo sandulle ayay ku soo wadeen. Macallinkii ayaa loo keenay, markaas ayuu si xun dhaawac u garsiiyey. Muddo dheer kaddib, ayaa Bulxan walaalkiis Geelle isna ka fakaday dugsigii. Geelle wuu orod dheeraa. Wax orod ku gaara lama arag oo aan macallinka ahayn. Bulxan iyo macallinkii ayaa raadiyey Geelle. Balliga Gaafow ayaa lagu sheegay isaga oo hurda. Ga labti ayaa Bulxan iyo macallinkii u yimaadeen Geelle, isaga oo geed hurda. Markii ay soo kor istaageen, ayuu booday oo cararay. Macallinkii ayaa soo qabo is yiri, markaas ayaa Geelle u gooyey. Macallinkii ayaa is majiiray oo dhacay oo kabihii yeelashii ka go'een. Markaasuu ku ordi waayey qodaxdii iyo gucundhadii. Macallinkii cagaha, ayuu ka dhiigay. Geelle habeynkii ayuu magaalada soo galaa oo u soo dhuuntaa hooyadiis Mullaaxo. Cunto inta cuno, ayuu dibedda seexan jirey. Quraankii markii uu dhammeeyey Bulxan, ayuu ku naqtiimay oo si wanaagsan dusha uga qaybay.

Sidaas iyadoo lagu jiro, ayaa Bulxan walaashiis Faadumo ka timid Feer-feer. Faadumo, waxay Bulxan ka weyn tahay labo sano.

Faadumo waxay Bulxan uga sheekaysaa hooyadood. Bulxan niyadda ayuu ka sara kacay. Wuxuu jecleystay mar keliya, inuu hooyadiis arko. Isagu weligiis muu arag iyada. Hadalladii iyo sheekadii Faadumo, waxay ku dhaliyeen hilow iyo jeclaan Bulxan. Bulxan waa wiil niya adag oo hadduu wax is yiraahdo samee ka dhabeeya. Galab cirka roob ka da'ayey, ayuu goostay inuu magaaladii hooyadiis deggeneyd u lugeeyo. Arrintaas cidna uma uu sheegin. Aabbihiis Jaamac wuu ka qariyey, wixii niyadiisa ku soo dhacay. Xoog jecayl ah ayaa qaaday Bulxan. Qorraxdhicii ayuu jidka baabuurta ku dhacay. Jidku wuu dheer yahay. Wuxuu sii maraa Shiilaabo.

Fiidkii ayuu cid ku soo hoydey. Ciddu geel ayay lahayd. Caano-geel, ayay ciddii ku soortay Bulxan. Nin geelley ah, ayaa la sheekaysanayey nin kale.

«Waryaa! War ma aragtay wiilka yar oo u lugaynaya Feer-Feer?»...... Mid ayaa weydiiyey kii kale.

«Haa, waan arkay!»...... Ayuu kii kale uga jawaabey.

«Oo maan ka dhiganno qawsaar geela inoo ilaaliya?» ...... Mid ayaa midkii kale weydiiyey.

Intaas hadalladooda Bulxan wuu dhegeysanaayaa. Isagu markuu hadalladoodii maqlay ayuu naxay. Bulxan wuxuu jecel yahay xornimada. Sidaas ayuu ciddii habeynkii kaga dheelmaday. Habeyn-barkii ayuu isa sii daayey. Jidka weligiis wuxuu ka qaadaa goonyaha. Baabuurta wuu ka cararaa, oo wuxuu u maleeyey, in aabbihiis ku soo raadin doono baabuur. Jidka aad iyo aad ayuu ugu ordaa. Gadaashiisa ma dhugto. Habeynku waa gudcur dam ah. Wixii agtiisa maraya, muu arki karin. Shanqar ayaa dabadiisa ka yeereysey. Shanqartaas markii uu sii maqlaba, wuu sii ordi jirey. Shanqartuna way daba socotay. Bulxan markii uu arkay in shaqurtu ay dhab tahay ayuu istaagay oo is yiri bal hubso. Nin ayuu arkay muuqaashiis. Ninku wuxuu ahaa sodcaal. Isaguna wuxuu jeeday Shilaabo.

«War waa kuma!»...... Ninki ayaa weydiiyey Bulxan.

«Waa aniga!»..... Bulxan ayaa ugu warceliyey ninkii.

«Xaggee baad u socotaa?»...... Ninkii ayaa Bulxan weydiiyey.

«Waxaan u socdaa Feer-Feer!»...... Ayuu Bulxan ku yiri ninkii.

«Anna waxaan u socdaa Shiilaabo!»...... Ninkii ayaa ku yiri Bulxan.

Ninkii qalaadaa iyo Bulxan, ayaa habeynkii oo idil guureynayey. Waagu markuu beryey, ayay si fiican isku arkeen oo isu waraysteen.

Bulxan intii uu ninka la socdey, wuu ka cabsanayey isaga. Ninkii qalaadaa wuxuu Bulxan u sheegay inuu ka yimid meel fog. Wuxuu jeclaa inuu ninka ku sii wehe-

shado jidka, hase yeeshee ninku wuxuu ula ekaaday nin aan arxan lahayn. Taasi waxay noqotay run. Barqadii ayaa ninkii ka dhuuntay Bulxan. Bulxan markii uu ninka la sheekaysanayey, ayuu ka maqlay ninkii qalaadaa, in jidku leeyahay libaax. Harkii ayaa Bulxan u yimid qolo shaqaale ah, oo jidka ka shaqaynaysa. Shaqaalahaas waxaa ku jirey nin Bulxan yaqaanna. Ninka magaciisa waxaa la oran jirey Yuusuf. Yuusuf markii uu nabdaadiyey Bulxan ayuu ku yiri:

«Xaggee baad u socotaa?

«Waxaan u socdaa hooyaday oo Feer-Feer deggan»

...... Bulxan ayaa ugu jawaabey Yuusuf.

«Ma aad og tahay inay meeshu halis tahay oo jidku libaax leeyahay?»...... hadalkaas waxa ku yiri Bulxan Yuusuf.

«Haa, waan ogahay in jidku libaax leeyahay, hase yeeshee waxaan doonayaa inaan hooyaday soo arko oo aan markaas ka soo noqdo!»...... Bulxan ayaa hadalkaas xoog u yiri.

«War hooy joog oo baabuurka shaqaalaha oo imaan doona sug aan kugu daree oo aad aabbahaa iyo Wardheer u noqotide!»...... Yuusuf ayaa ku celiyey weydiintiisii.

«Anigu weligay hooyaday maan arag, sidaas daraaddeed waa inaan arkaa iyada, haba ahatee mar keliya!».... Bulxan ayaa haddana hadalkiisii ku adkaystay oo ka dhaqaaqay Yuusuf.

Yuusuf markii uu dhammeeyey hadalkii, ayuu ka tegey Bulxan. Maalintii oo dhan ayuu Bulxan jiidkii sii hayey. Xilligu wuxuu ahaa dayr bilawgeed. Kaliil ayay ahayd. Kulku aad buu u badnaa. Roob yar ayaa dhulku lahaa. Caleemuhu markaas ayay soo baxayeen. Madaxyo roob ah, ayaa meel walba ka muuqdey. Raysku dusha sare ayuu ka qallalnaa, hoose wuu ka qoyanaa. Bulxan wuu harraaday. Biya uu cabbo, ayuu ka raadraadiyey meel walba, hase yeeshee dhibicna muu helin. Qorraxdu aad iyo aad ayay u sii kululaatay, dabayshuna waxay wadatey hongorre iyo holac wejiga kaa leefaya. Xoogaa haddii uu socdey ayuu goojooday. Waqtigu wu-

xuu ahaa casarliicii. Miro yicibeed oo curdan ah ayuu helay oo cunay. Markaasaa yicibkii calasha kaga dhegey. Bulxan intuu miyir beelay, ayuu jidka agtiisa ku dhacay. Cabbaar haddii uu jidkii yiil isaga oo miyir la' ayuu indhaha kala qaaday. Agtiisa waxa fadhiyey naag duq ah. Haweeneydu biyo ayay madaxa kaga shub-shubaysey. Bulxan markaas ayuu toosay. Markuu toosay, ayaa haweeneydii siisay biyo barax leh. Bulxan erayna uma uu celin haweeneydii. Mahadnaq naftiisa oo idil ayuu uga celinayey inkastoo uunan iyada ku oran «Mahadsanid». Haweeneydu markii ay warsatay Bulxan, ayuu iyada u sheegay magaca aabbihiis iyo meeshuu ka yimid iyo meeshuu u socdo. Haweeneydii way calaacashay oo qalbiga ka xumaatay. Iyadu waxay u noqotay Bulxan horseed. Iyada ayaa ka duweysey meeshii libaax iyo bahalladu ku badan yihiin. Iyadu waxay kala taqiinney dhulka iyo dhabbayaasha la qaado. Cido badan oo meel deggan ayaa Bulxan iyo iyadu ku hoydeen. Maalin ayay kaga tagtay Bulxan meel.

«Ciddaas ayaan waxaan cunno inooga soo qaadayaaye meeshaada joog oo i sig!»..... Haweeneydii ayaa Bulxan sidaas ku tiri.

«Haye, waan ku sugaya intii aad ka soo noqotid!»..... Bulxan ayaa haweeneydii ku yiri sidaas.

Bulxan intii uu meesha joogey, ayuu jidka agtiisa wuxuu ku arkay qori meel looga tegey. Markaas ayuu ku soo dhaqaaqay meeshii qorigu yiilley. Qorigu wuxuu ahaa Uustar. Bulxan markaas ayuu soo qaatay qorigii oo garabka gashaday. Meeshii isaga oo ku sugaya haweeneydii, ayaa niman u yimaadeen isaga. Waxay ku yiraahdeen qoriga na sii. Bulxan wuu diidey iyaga inuu siiyo qoriga.

«Haddaadan qoriga na siin, waannu ku dilaynaa!» ...... Nin raggii ku jirey ayaa hadalkaas yiri.

Intaas markuu Bulxan ka maqlay nimankii, ayuu naxay. Bulxan muu yaqaanno sida qoriga loo rido. Hase yeeshee qorigii ayuu afkiisii ku jeediyey nimankii. Nimankii markaas ayay nexeen oo cabsadeen. Nin iyaga ka

mid ahaa, ayaa wuxuu Bulxan ku yiri: «Qoriga aan kaa gadno?». Bulxan wuu fakaray. Wuxuu ogaadey in qorigu uu culus yahay, uunan aqoonnin sida loogu isticmaalo. Markaas ayuu nimankii ku yiri: «Haye, waan idin ka gadayaa qoriga ee immisaad iga siinaysaan?». Ceesaan iyo caano geel oo sibraar ku jira yaannu kaa siinaynaa!»...... Ayaa nimankii ku heshiiyeen. Bulxan oo arrintaas madaxa ka gilgilaya, ayaa haweeneydii ku soo noqotay. Markay aragtay Bulxan oo nimankii qori ku shiishaya, ayay sii naxday. Markaas ayay inta soo ag istaagtay Bulxan la faqday.

«Maandhe ceesaan iyo sibraar caano geel ah, haddii ay naga siisanayaan, iska sii qoriga»...... Haweeneydii ayaa Bulxan kula faqday.

«Ceesaan iyo sibraar caano geel, waa maxay?»........ Bulxan ayaa ku yiri duqdii.

«Haddii aadan siinnin iyaga qoriga, iyagu marna nagama hari doonaan: Waxay ina miri doonaan habeynkii!»........ Haweeneydii ayaa Bulxan ku cabsiisay. Nimankii nin ayay u direen ceesaan, sibraarkiina mid baa gacanta ku haya. Kol danbe, ayaa ninkii ceesaantii keenay. Nimanku waxay deggan yihiin meel dhow. Bulxan markaas ayuu yeelay waanadii duqdii. Ceesaantii iyo sibraaarkii caanuhu ku jireen, ayay nimankii u dhiibeen duqdii. Kolkaasaa Bulxan iyo duqdii dhaqaaqeen. Iyagu waxay tiigsadeen tallaabadii sidii ay uga dheeraan lahaayeen meesha nimanku joogeen. Xoogaa markii ay dhaqaaqeen, ayaa nin nimanki ka mid ahaa qayliyey.

«Ee hooyo! Bal joogsada inyar!».

«War aammus! Maxaad ugu yeeraysaa duqda iyo wiiilka!»....... Mid kale ayaa kii hore uga war celiyey.

Ninkii hore, ayaa soo farabaxsaday oo wuxuu damcay inuu ka daba yimaado Bulxan iyo duqdii, isaga oo qorigii gacanta ku wata. Duqdii markaas ayay Bulxan gacanta inta ku dhegtey dhaqaaqday. Ninkii nin kale ayaa ka qabtay duqdii iyo Bulxanba. Isagu wuxuu doonayey inuu soo ceshado caanihii iyo ceesaantii. Maalintii oo dhan ayay Bulxan iyo duqdii jidkii barbar socdeen. Ha-

beynkii ayay meel ka fog waddada seexdeen intay ceesaantii geed ku xireen. Duq Ashkiro waa haweeney caqli iyo fiiro dheer. Iyadu way gaaban tahay midabkeeduna waa casaan-maarriin ah.

Wejigeedu wuu wareegsan yahay, ilkaheedu laba ilig oo hoose, ayaa ka maqnaa. Bulxan wuxuu weydiiyey iyada inay leedahay carruur iyo in kale. Waxay isaga u sheegtay inay carruurteedii le'deen badi. Hadda waxaa ilmihii uga haray iyada laba carruur ah; wiil iyo gabar. Labadooduba xaas ayay leeyihiin. Wiilku wuxuu deggan yahay Walwaal, gabadhuna waxay deggan tahay Shiilaabo. Ashkiro waxay u socotaa gabadheeda. Ashkiro wejigeedu wuxuu leeyahay duuduub dhaadheer. Indhaheedu way cawlan yihiin. Timaheeda waxa ku jira midmid cad. Sankeedu wuu bagafsan yahay. Bishimaheedu way yaryar yihiin.

Garkeedu wuu dhuuban yahay. Gacmaheedu way qallafsan yihiin. Maro subeeci ah oo faraqyo leh, ayay qabtaa. Kabaheedu waa kaba-soomaali. Madaxa waxaa u saaran ganbo duqowedey oo basaasan. Ashkiro waa hooyo dhab ah. Bulxan wax kasta way siisaa. Marka hore biyaha isaga ayay u dhiibtaa. Harkii maalintii danbe, ayay qasheen ridii. Ashkiro waxay wadatey kolay. Kolayga waxaa ku jirey mindi. Mindidii ayay ridii ku gawracdey. Kolayga haddana waxaa ugu jirey kabriid. Dabkii markii ay Ashkiro shidday, ayuu Bulxanna inta hilbihii googooyey xaabana raadiyey. Ashkiro waxay qodday hog. Hoggii ayay ridii ku hogeysteen. Maalintaas Bulxan si weyn ayuu hilib u cunay. Hilibka ceesaantu wuu macaanaa. Intii ay cuneen mooyee, hilibkii intiisii kale way qaateen. Galabtii iyo habeynkii oo dhan, ayay socdeen. Shantii arooryaad, ayay geed hoostiis seexdeen. Muddo inttii sadex saac ah, ayay hurdeen. Markii ay hurdada ka keceen, ayay biyo dhagax sallax ah ku jira heleen. Biyihii ayay inta ka cabbeen, kuna mayrmayrteen. Biyaha agahooda waxa duulduulayey Haad.

Galabtii danbe, ayay soo galeen Shiilaabo. Shiilaabo waa tuulo yar. Iyada waxaa ka cabba geelal, ariyow iyo lo' badan. Dukaammo iyo makhaayado alwaaxyo ah,

ayaa ka dhisan sida tuulo kasta ee soomaaliyeed. Guryaha ka dhisani waxay u badan yihiin aqal-soomaali.

«Shiilaabo waannu nimid!»...... waxaa ku tiri Ashkiro Bulxan.

«Haa, Ilaah mahadiis, waannu nimid!»...... Bulxan ayaa ku yiri Ashkiro, isaga oo faraxsan.

«Maandhe! Magaaladii haddii aynnu nimid, anigu waan kaa tegeyaa, isna arki maynno mar danbe, nabadgelyo!»...... Ashkiro ayaa ku tiri Bulxan. Bulxan markii uu maqlay hadalkaas ayuu naxay. Isagu wuxuu jeclaa teer iyo intii Feer-Feer inuu jidka ku weheshado Ashkiro.

«Magaalada waxaad ka heli doontaa qof aabbahaa yaqaanna, baabuur i saar dheh oo u noqo Wardheer»....... Ashkiro Bulxan ayaa sidaas ku waanisey.

Hase yeeshee Bulxan muunan jecleyn inuu Ashkiro ka qaato waanadaas. Sidaas ayay ku kala bayreen. Qofba meel ayuu ka galay tuuladii. Bulxan wuxuu aadey makhaayad ku taalla tuulada. Wuxuu damcay inuu ka shaqaysto. Hase yeeshee shaqo waa loo diidey. Makhaayadda agteeda ayuu iska fariistay cabbaar. Xoogaa yar oo hilib ah oo feen ah, ayuu ka helay nin makhaayadda wax ka cunayey. Tuulada ayuu inta inyar ka fogaadey, geed qurac ah hoostiis seexday. Galabtii ayuu ceel biyo u soo doontay. Biyihii markii uu cabbay, ayuu ka dheelmaday.

Jidka Feer-Feer loo maro, wuxuu lahaa dhagax. Isagu ma ahayn sidii jidkii Wardheer-Shiilaabo oo kale. Jidka Wardheer-Shiilaabo ku socodkiisu wuu wanaagsanaa. Bulxan wuu kaba la'aa. Habeynkii oo dhan ayuu xiimayey. Gadaashiisa shanqaro, ayaa ka yeerayey. Qoobabkiisu waxay tuurtuurayeen dhagaxyo. Jidka markuu aad ugu socdaba, waxaa aad loo maqlayey quruurux cabsi. leh. Qaylada qaruuraxa, ayaa baqdin. Bulxan sii gelineysey. Markaas ayuu orodka sii boobaa. Bulxan dhaxanta iyo geyruhuba ma karaan. Jirkiisu wuxuu yeeshay gawtiyo, cagahiisuna way qolfoobeen. Qodax iyo jirrid xaabaalan iyo kufidu, waxba kama taraan. Cagahiisu waxay yeesheen jilfo adadag oo aan xanuunku wax ka tarayn. Bulxan habeynkii oo idil ayuu guureynayey oo uunan seexan. Intuu sadcaalka ku jirey habeynna si

wanaagsan uma uu gam'in. Bil ku dhawaad ayuu ku soo jirey jidka Wardheer iyo Shiilaabo u dhexeeya. Intaas oo idil mar keliya, ayuu ka nastay. Oogadiisii inta qallashay, ayay qorroxdiyo dhaxantuba ayan wax ha qaadaynnin. Aroortii barqadii ayuu seexday. Markaas ayaa hurdadii waxa ka kiciyey guux baabuur. Baabuurrada Bulxan wuu ka cararaa. Baabuurta waxa ku jira askar Ingriis oo gumeystuhu ka soo qaaday Kenya. Colka baabuurradu ay wadaan waxa la oran jirey K.A.R. Iyagu dadka si xun ayay u dilaan. Sidaas daraaddeed Bulxan wuu neceb yahay Ingriiska iyo askartiisaba. Guuxii baabuurka markuu maqlay Bulxan, ayuu geed ku dhuuntay sidii bahal oo kale. Baabuurkii ayaa meel u dhow istaagey. Qaylo iyo af-qalaad ayuu Bulxan maqlay, markaas ayuu sii naxay oo qarqaray. Waxyar kaddib, ayaa baabuurkii meeshii ka dhaqaaqay. Baabuurka waxa watey ciidan Ingriis ah. Meeshii uu baabuurkii ka tegey, ayaa Bulxan soo ag istaagey. Qare iyo daasado hilib (biif ahi) ku jiraan, ayuu Bulxan feenfeentay. Qarihiina qoloftii ayuu ku cunay. Si xun ayaa maalintaas gaajo u haysey Bulxan. Wax kasta wuu cuni lahaa haddii uu helo maalintaas sida gaajadu u haysey.

Bulxan goobtii ayuu ka tegey. Inyar haddii uu socdey, ayuu wuxuu arkay haad meel ku degdegaya. Wuu fakarey. Isagu wuxuu damcay, inuu tago meesha haadku ka duulduulayo. Cabbaar ayuu tallamay inuu iska daayo meesha iyo inuu tago. Haadku laba waxyaaloodba meel wuu ku duulaa. Markii uu biyo meel ku haysto wuu ku ag duul-duulaa iyo markii uu raq meel ku haysto. Bulxan wuxuu kala garan waayey inay tahay raq iyo inay tahay biyo. Haddii ay tahay biyo oo uu kaga tago sidaas, oon ayuu u dhiman doonaa! Haddii ay tahay raqna, libaaxu kama ag fogaado raqda. Taasna wuxuu ka baqay in libaaxu cuno. Sidaas ayuu wax badan ku tallamay. Talo waxay kaga dhammaatay, inuu iska tago oo uu iska nasiibsado. Goobtii uu haadku ku ag duulduulayey, markii uu yimid, ayuu wuxuu ku arkay biyo meel sallax ah ku jira oo haadku ka cabbayo. Biyihii markuu arkay Bulxan, ayuu aad iyo aad u farxay oo boodboodey. Biyihii ayuu ku dhex dhacay oo sidii xoolihii raqay. Maradii ayuu kula dhex dhacay biyihii.

Laba saac intii ah, ayuu biyihii ag fadhiyey. Haadku korkiisa ayuu ag duulduulayey isagoo qaylyaya. Haadkaas waxaa ka mid ahaa xuunsho, gorgor, baqalyo coomaadi, tuke iyo aboodi. Intaas oo dhammiba hilibka ayay cuntaa. Bulxan wuxuu ka baqay in haadda libaax soo racacaa oo uu meesha ugu yimaado. Markuu garwaaqsaday inay taasi suurtoobi karto, ayuu ka luuday meeshi. Maalintaasi Bulxan waxay u ahayd maalin barwaaqo ah, maxaa yeelay dhawr beri intii ah, biyo muunan cabbin. Cabbaar markuu luudayey, ayuu tallaabadii boobay. Gelinkii hore iyo galabti ayuu si xoog leh u socday Bulxan, isaga oo aan marna istaagin. Fiidkii ayuu arkay dab meel ka baxaya. Hawadu way qaboobeyd maalintaas, cirkuna wuu daruuraynayey. Meel waliba way xasillanayd. Shanqar la'aanta iyo shibbanaantu waxay ku kordhinayeen Bulxan cabsi iyo welwel. Dabka baxayey, wuxuu u malaynayey cid ama tuugo ama col. Bulxan tuugada iyo colku waxay kollaba uga roon yihiin dugaagga iyo bahalka. Meesha uu marayey, waxaa ka bilawda jidkii Qalqallooc. Qalqallooc waxa loo yiri, in jidadku wada qalqaloocan yihiin. Jidadka qalqaloocani waxay la wareegtaan buuraha. Baabuurraduna jidadkaas qalqalloocan ayay maraan. Qolfkii mara jidadkaas qalqalloocan, muddadu way ku dheeraataa oo waxay ku qaadataa afar jibbaar.

Bulxan jid kale ma yaqaanno, sidaas daraaddeed ayuu wuxuu ku tashaday inuu iska qaado jidadkaas buuraha Qalqallooc la wareegta. Dabkii markii uu yimid, ayuu wuxuu arkay cid. Ciddu waxay haysatey aryo. Meel u dhow iyaga ayuu Bulxan seexday siduu isu tuso inuu marti yahay. Habeynkii oo dhan ayuu sugayey inay waxuun u keenaan.

Ciddii Bulxan waxba uma ay keenin oo way ka seexatay. Intuu u yimid ciddii, ayuu caano warsaday. Marka maalintii oo dhan ayuu ku socdey jidadkii Qalqallooceed. Fiidkii ayuu u yimid niman shaqaale ah oo jidadka qalqallooceed samaynayey. Shaqaaluhu wuxuu haystey ri. Rida caanaheeda waxa lagu caddayn jirey shaaha. Shaqaaluhu wuxuu ku quraacdaa qaloon iyo shaah. Koonbo qaloon ah iyo shaah caddaysan, ayay u keeneen Bulxan. Haddii aad gaajaysan tahay cunta kastaa way macaan

tahay! Shaqaaluhu aad iyo aad ayuu uga xummaaday jidka xun oo uu Bulxan soo maray. Iyagu waxay u sheegeen Bulxan inuu jiro jid toos ah oo aada Feer-Feer. Nasiib-xumo Bulxan muunan aqoonnin jidkaas. Qaloonkiisii ayuu inta faraqa ku shubtay, jidkiisii ku dhacay. Fiidkii ayuu wuxuu maqlay shanqar. Shanqartu waxay ahayd niman socoto ah.

«War waa kuwama?»...... Bulxan ayaa nimankii warsaday.

«Waa kuwano yaad doonaysaa.... » Niimankii ayaa Bulxan warsaday.

«Waaxan doonaya inaan idin ka waraysto meesha aad u socotaan!»

«Waa kuwaan! Yaa doonaysaa!!...... Waxaan doonayey inaan idin waraysto meeshii aad u socotaan?»....... Bulxan ayaa socotadii warsaday hadalkaas isaga oo qarqaraya.

«Xaggee baad u socotaa?»....... Nin foolxun oo waji kaduudan oo indho gudguduudan ayaa cod kulul Bulxan ku warsaday.

«Raalli ahaada, haddii aad Feer-Feer u socotaan, ma idin raaci karaaa?»....... Bulxan ayaa ku adkaystay hadalkiisii.

Nimankii socotada ahaa way is dhugteen.

«Soo bax, ina keen!»...... Ayay Bulxan ugu jawaabeen inta dhaqaaqeen. Bulxan arrintaas aad iyo aad ayuu ugu farxay, maxaa yeelay Shiilaabo kaddib, wuu cidloobey oo bahaloobey. Isagu wuxuu jeclaa inuu wehel helo. Habeyn barkii yay seexdeen meel. Meeshu waxay lahayd geedo yaryar iyo dooxo.

Arooryadii hore, ayay ugu carareen Bulxan isaga oo goobtii hurda. Markii uu ka toosay hurdadii, ayuu arkay in nimankii ka tageen. Wax kale oo uu samayn karay lama arag inuu caayo mooyee.

«Nacallaa idin ku yaalla, war wuxu dadba ma aha!» ...... Bulxan ayaa ku dhawaaqay tixdaas sidii isaga oo cidi la hadlayso oo kale. Bulxan waddadiisii ayuu ku

arooray. Maalintii oo dhan, wuxuu caayeyey nimankii socotada ahaa iyo ciddii ka seexatay. Middaas keliya ma ahee, haddana inkaari haddii ay wax tarto wuu inkaarayey. Fiidkii danbe, ayuu haddana cid soo martiyey. Ciddu waxay haysatey ari. Sida Bulxan oo kale cidda waxaa marti u ahaa nin dhutinaya oo duq ah. Habeynkii Bulxan iyo duqii waxay seexdeen meel u dhow cidda. Habeynkaas waa laga seexday labadoodiiba. Aroortii hore, ayay martidii ka luudday meeshii.

Ninka duqa ahi, wuxuu isna u socday Feer-Feer.

«Adeer! xaggee baad u socotaa?»....... Bulxan ayaa duqii weydiiyey.

«Waxaan u socdaa maandhe Feer-feer!»...... Ayaa duqii ugu jawaabey Bulxan.

«Adna?»...... Duqii ayaa weydiiyey Bulxan.

«Aniguna waxaan u socdaa Feer-feer!»...... Bulxan ayaa duqii ku yiri.

«Hadda ka hor, adeer!, ma tagtay Feer-feer?»....... Bulxan ayaa duqii weydiiyey.

«Haa, maandhe!, waan tegey, waa hore?»....... Duqii ayaa ugu jawaabey Bulxan sidaas.

«Feer-feeer ma magaalo weyn baa?..... Bulxan ayaa weydiiyey duqii.

«Waa magaalo yar, waa tuulo, maandhe!»....... Duqii ayaa ku yiri Bulxan.

«Feer-feer yaa kuu jira?»...... Duqii ayaa weydiiyey Bulxan.

«Adeer, waxaa ii jira hooyaday!»...... Bulxan ayaa ku yiri duqii isaga oo cod jilicsan ku yiri sidaas.

«Hooyadaa yaa qaba?»....... Ninkii ayaa ku yiri Bulxan.

«Waxaa qaba nin!»...... Duqii ayuu Bulxan ku yiri.

«Hadda ka hor hooyadaa ma aragtay?»........ Duqii ayaa Bulxan ku yiri.

«Maya adeer! Weligay ma arag!»....... Intuu cabbaar aammusay ayuu Bulxan ugu jawaabay duqii.

«Oo maxaa dhacay!»....... Duqii ayaa ku yiri Bulxan isaga oo yaabban.

«Hal sano markaan jirey, ayaa hooyaday la furay!» ........ Bulxan ayaa yiri isaga oo naxsan.

«Intii iyada la furay teer iyo maantay, ma arag hooyaday!»........ Intaas ayuu sii raaciyey Bulxan.

«Maandhow markii aan tagno Feer-feer ha iga dhuuman!»........ Duqii ayaa weydiistey Bulxan.

«Adeer kaa dhuuman maayo, hooyaday waan kaa martisoori doonaa!»........ Bulxan ayaa duqii ku yiri.

«Feer-feer immisay jirtaa?»...... Bulxan ayaa duqii weydiiyey.

«Berri galab ayaannu tegeynaa!»...... Duqii ayaa Bulxan ugu jawaabey. Bulxan markii uu taas maqlay, ayuu aad iyo aad ugu farxay. Kashiisii ayaa furfuratay, laabtiisiina way degtey.

Dunidii oo idilu way u furfuratay Bulxan. Niyadii culayskii ka saarnaa wuu ka jabay. Farxad ka weyni ma jirto markii carruur hooyadood wax badan ka maqnayd, ay u timaaddo.

Bulxan wuxuu xusuustay hees, carruurtu ku heesi jirtey waagii uu aad iyo aad u yaraa. Carruur kasta oo soomaali ahi, way taqaannaa heestaas. Bulxan wuxuu cabsi ka qabaa in hooyadiis uu ka waayo Feer-feer oo ay meel kale u dhooftay. Taasi haddii ay dhacdana waa guuldarro iyo geeri. Wuxuu xusuusan yahay intii uu soo maray dhul iyo intii uu halis galay iyo intii uu ku noolaa silic iyo saxariir. Heestu way saamaysaa Bulxan, markii uu xusuustaba.

Huuwaye Huuwa!
Huuwaye Huuwa!
Hooyo ama joogto
Hooyo ama joogto

Huuwaye Huuwa!
Huuwaye Huuwa!
Hooyo ma joogto
Kor iyo koofur aaddey
Kabaheedii qaadatay
Kabax kabax u socotay
Huuwaye Huuwa!
Geeljire helyaa mooyi
Godkii Habas Dheere
Ku habowdayaa mooyi
Huuwaye Huuwa!
Huuwaye Huuwa!
.....................
.....................
.....................

Habeynkii oo dhan Bulxan il isma uu gelin. Wuxuu ka fakarayey hooyadiis iyo jeclaanta uu u qabo. Jeclaanta hooyannimadu wax badan ayay Bulxan ku ahayd cudar. Jeclaantu wax badan hadday qofka ku raagto, marka danbe waxay ku noqotaa cudur iyo qandho ka dhammaysa qofka dhiigga. Bulxan dhiiggiisu wuu madow yahay, wuuna ku yar yahay. Muuqaashiisu waxay u ekaatay dugaag. Timihii ayaa ku dheeraaday, oogadiisuna way qallashay, lafahiisuna way baxbaxsanaayeen. Indhihiisu godad shishe ayay ka soo jeedeen. Quruxda keliya oo u hartay Bulxan waxay ahayd ilkihiisa cadcad. Markuu dhoollo caddeeyo, ama uu foolasha qaawiyo, ayuu u ekaadaa dad. Inkastoo uu dhiig yaraa, haddana habeynkaas wadnahiisu wuu rugrug lahaa.

Labaatan jeer ayuu dhinac walba isu rogaa oo isu rogey oo seexan waayey!! Intaas wuxuu dhererayey intii waagu ka beryo. Habeynku wuxuu u dheeraa sidii bil oo kale. Duqiinna wuu seexan kari waayey oo wuxuu ka baqayey in wiilkii uu ku cido geli lahaa ka tago! Waagu markuu soo dhawaadey oo kaahii qorraxdu fallaaro saymo leh keenay, ayuu Bulxan istaagay. Maalintaasu waxay ahayd maalin weyn. Abuurtoo dhammi way qurux badnayd. Heesaha shinbiruhu waxay la ahaayeen Bulxan baaqid, ay ugu baaqayaan isaga bishaaro iyo khayr.

Kaaha qorraxda ee arooryaad iyo saymaha mida-

byada kala duwan leh oo qorraxdu, waxay ugu bishaaraynayeen Bulxan liibaan iyo barwaaqo bashbash leh. Waa run in jecaylku ka adag yahay necbaanta, noloshuna ka adag tahay geerida, iftiinkuna ka adag yahay mugdiga, xornimaduna ka adag tahay gumeysiga. Waa dhab, waa dhab jeclaantu! Sidaas ayay saymaha qorraxda arooryaad ku lahaayeen Bulxan.

Bulxan markii uu istaagnaa in cabbaar ah oo uu ku raaxaysanayey saymaha arooryaad, ayuu ku baxay dhabbihii hooyadiis u geyn lahaa. Duqiina xamaamadii ayuu isna la kacay.

Waddadii caddayd oo gaarsiin lahayd Bulxan Feer-feer, ayuu ka boor kiciyey. Galabtii ka hor inuu tago magaalada ayuu ku tashaday. Ku dhawaan galabtii afar saac, ayuu magaaladii Feer-feer ku soo baxay. Wuxuu arkay haween meel ku tuunsan. Markaas ayuu ku soo dhawaaday oo ku soo dhawaaday.

Haweenkii way kala tageen mid mooyee. Iyadu waxay ku dhaygagsanayd cunugga ka soo muuqda meesha fog. Haweeneydu waxay gacmaha ku haysay cunug yar. Intaas Bulxan wuu ku soo dhawaanayey oo soo dhawaanayey. Dhaygagga haweeneyduna wuu sii kordhaa oo sii kordhaa. Bulxan wuxuu u malaynayey in qofkaas hooyadiis tahay oo sugaysa. Dhiiggiisii ayaa kacay, wadnahiisuna wuu rugrug lahaa. Inkastoo galabtu kululayd, haddana Bulxan iskama dareemin kulayl marna maalintaas. Haweeneydii ayuu Bulxan soo ag istaagey oo isaga oon hadalna oran, ayuu aad iyo aad u eegay oo u eegay iyada. Xaliimo iyana in cabbaar ah, ayay ku dhaygagnayd Bulxan. Markaas dabadeed ayay warsatay. Bulxan isuma uu sheegin Xaliimo ee wuu iska qariyey haweeneydii. Magac kale ayuu u sheegtay iyada. Xaliimo iyadu waxay isaga ka dhugatey faraha lugaha iyo gacmaha. Markaas ayay ku tiri isaga. «War ma Ina Jaamac baad tahay?» Bulxan haddana wuu ka aammusay haweeneydii. Markii danbe, ayay cuniggii dhabta u saarnaa iska tuurtay oo tiri; iyada oo ilmaynaysa:

«Alla hoogey, alla hoogey oo ba'ay, waxani ma wiilkaygii baa!».

Bulxan intuu adkaysan waayey, ayuu yiri: «Haa, haa hooyo........ hooyo ......... hooyo!» — Isna wuu ku belwey hooyadiis.

«Imii.... imii.... imii..... hooyo!..... hooyo!.... hooyo! Maxaad marna iigu iman weydey!».

«Hooyo!...... hooyo!...... hooyo! kuma ilaawin, waxaan jeclaa inaan mar kuu imaado, waanse kari waayey!» Xaliimo ayaa Bulxan ku laab qaboojisey. Xaliimo markaas ayay labadii carruurba dhabta ku qaadday, inta gurigeedii ku soo dhaqaaqday! Duqii isna mar danbe, ayuu imo iyo Bulxan oo sheekaysanaya soo gaaray.

«Maandhe! maandhe! maandhe! ha iga tegin!»........ Duqii ayaa ku yiri Bulxan, intayan gelin gurigii.

«Hooyo! ninkaani waa jaalkay. Wax uu cuno ha la siiyo!»........ Bulxan ayaa hooyadiis ku yiri hadalkaas qabow.

«Qof kasta oo aad maanta tiraahdo, wax ha la siiyo, waan siinayaa!'.... Xaliimo ayaa Bulxan degdeg ugu jawaabetey. Bulxan gurigii duggaalka lahaa ee cariishka ahaa, ayaa la geeyey. Maalintii oo dhan ayaa loo qubeynayey oo subag iyo sixin lagu daliigayey, sidii uu ugu ekaan lahaa qof. Dhar cusub, ayaa hooyadiis Xaliimo uga keentay dukaanka. Xaliimo waxay u sheegtay wiilkeeda in afar walaalood oo kale la dhasheen. Iyaga qaar wuu maqan yahay, qaarna wuu joogaa. Habeynkii mar danbe, ayay Xaliimo u sheegtay Bulxan sheeko. Waxay tiri.

«Waxaa la yiri, nin baa haweeney qabay. Iyadu waxay u lahayd wiil. Maalin malmaha ka mid ah, ayaa ninkeedii iyo iyadii dirireen. Markii ay heshiin waayeen, ayaa noloshoodii gashay dhib iyo ciriiri. Maalintii danbe ayay is fureen. Haweeneydii waxay damacday inay iska tagto oo wiikii yaraa qaadato. Ninkii waxay ku tiri: «Ii daa wiilka aan inoo koriyee!».

Ninkii wuxuu ugu jawaabay iyadii: «Wiilkayga uma doonayo silic iyo rafaad inuu ku koro oo uu ku ag noolaado nin aan aabbihiis ahayn!». Haweeneydu waxay doonaysey inay wiilkeeda wadato oo ay u diiddo in haweeney kale rafaadiso amaba silciso. Dani haweeneydii

waxay ku khasabtay inay ka tagto wiilkeedii. Wiilku wuxuu jeclaa inuu hooyadiis la noolaado, illowse adoogiis middaas kama oggolayn. Hooyadiis waxay damacday inay kaga tagto wiilkeeda xusuus uunan marna halmaamiin. Iyada oo ooyeysa, ayay waxay ku tiri wiilkeedii:

«Haddad Hirirwaale joogto,
Asaad Hawd halo ku haysto,
Maandhow anuun baa hooyadaa ah!».

Wiilkii wuu rajoobay hooyadiis markay ka tagtay. Haweeneydii aabbihiis guursaday, wuxuu ka heli jirey hooyadiis, ayuu ka waayey. Inkastoo iyadu ay u roonayd wiilka, haddana isagu kama helin wuxuu ka heli jirey hooyadiis oo xannaano iyo jeclaan ah. Haweeney kastaa oo wanaagsani, jeclaan ma siin karto ilmo ayan dhalin. Jeclaanta dhabta ahi, dhoodhoob kuma ay timaaddo.

Dhowr toddobaad markuu Bulxan la joogey hooyadiis iyo walaalihiis, ayaa dagaal ka dhexdhacay degmooyinkii meesha degganaa. Labada degmo oo dagaalku dhex maray, mid ayaa Bulxan ahayd degmadiisa. Hooyadiis Xaliimo waxay ka baqday in wiilka laga dilo, maxaa yeelay haddii colaadi dhexmarto laba degmo, carruuraha way iska layn jireen.

Sidaas ayaa Bulxan lagu saaray baabuur. Wardheer ayuu ku noqday Bulxan isaga oo aabbihiis ka quustay. Raadintii Bulxan waa laga samray oo waxaa loo malaynayey inuu dhintay. Aabbihiis markuu indhaha saaray wiilkiisii, ayuu ku naxay oo ilmo ku soo Joogjoogsatey. Bulxan aabbihiis iyo walaalkiis ayuu uga sheekeeyey wixii uu nolosha ka soo maray amaba ku arkay. Dadkii oo dhammiba way la wada yaabeen sheekadiisii. Bulxan aabbihiis wuxuu goostay inuu wiilkiisa aad iyo aad ugula dadaalo wax-barashada iyo iftiinka. Sanadu markay ahayd 1940, dhulka Soomaalida waxaa wada qabsaday gumeysatadii Ingriiska. Sidaas ayaa muuqaashii dhulku isu beddeshey, gumeysigii fashiistahana kii Ingriisku u beddeley.

WAXA LAGU DAABACAY

MADBACADDA QARANKA

XAMAR

**QIIMAHA**
**Sh. So. 4,50**